Axkaamta Dumarka

Suaalo iyo jawaabo

Waxaa su'aalaha ka jawaabay:
Shiikh Ibnu Taymiya
Shiikh Ibnu Baaz
Shiikh Ibnu Cutheymiin
Shiikh Ibnu Jibriin

Hordhac

Allaah ayaa mahad iska leh, nabad gelyo iyo naxariisina nabi Muxamed korkiisa ha ahaato iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa.

Kitaabkani wuxuu ka kooban yahay su'aalo ay ka jawaabeen culimada Shiikh Ibnu Taymiya, Shiikh Ibnu Baaz , Shiikh Ibnu Cutheymiin , Shiikh Ibnu Jibriin (dhammaan Alle ha u naxariisto) , su'aalahaas iyo jawaabahaas waxay ku saabsan yihiin axkaamta sharciga ah, sida salaadda, soonka, sakada, Xajka.

Axkaamtaani rag iyo dumarba way khusaysaa waxayse si gaar ah u taabanaysaa haweenka, iyadoo mugdi ka geli karo salaadeedii, soonkeedii ama cibaadooyinka kale ee dahaarada loo shardiyo.

Haddii aan tusaale u soo qaadano dhiiga caadada iyo axkaamtiisa waxaan arkaynaa ahmiyadda cilmigaasi leeyahay iyo sida loogu baahan yahay in juhdi badan lagu bixiyo, oo axkaamtiisa dadka loo sharxo.

Xaydka marka laga hadlayo waxaa laga hadlaa labo arrimood.

1. Usuusha baabka Xaydka
2. Furuucda ku taxaluqda baabka xaydka.

Usuusha baabka xaydka waa kooban tahay oo axaadiis iyo aayado ayaa ku soo arooray, waxaase mashaakilku ka yimaadaa furuucda, oo aan la koobi karin mar kastana wax cusub la arkayo loona baahan yahay in xukun sharci ah la waafajiyo.

Xiligii nabiga (S.C.W) iyo saxaabada ma jirin dhibkaan faraha badan oo ka jira axkaamta xaydka sababtoo ah dadku waxay ahaayeen dad isku bay'ad ku nool oo ma jirin futuuxaadka aduunka oo dhan lagu galay oo markaas loo tagey dad kala dhaqan iyo abuuris iyo cimilo duwan, waxaa kaloo jira maanta daawooyin dhalmada lagu kala fogeeyo oo iyaguna keenay cudurro jiha wareer ku riday dhiigii caadada taas oo keentay in ay soo baxaan waxyaalo badan oo horay aan loo aqoon oo u baahan in la eego axkaamta ay qaadanayaan.

Ragga sidoo kale waxaa mugdi ka gelayaa u galmoodkii xaaskiisa, nikaaxii, iyo furniinkii, ciddadii ma ka baxday mise kama bixin? Waxaas oo dhan waxay ka farcamayaan baabka xaydka.

Imaam Al-Daarami, kitaab gaar ah ayuu ka alifey, imaam An-Nawawi 200 oo bog ayuu kaga hadlay mana koobin axkaamtiisa ayuu yiri.

Imaam Ibnu Carabi oo ah culimada Maalikiyada wuxuu yiri: Wuxuu ka mid yahay masaa'isha beerka cunta (تأكل الكبد), isagoo ulajeeda mas'aladaani inay tahay mas'alo dhib badan oo culimadu in badan ka fiirsadaan fatwadeeda.

Imaamu Axmed wuxuu yiri: Sagaal sano ayaan ag fadhiyey ilaa aan ka fahmay, ma haboona in la fududaysto baabka xaydka, diintuna soon iyo salaad keliya ma ahan, haweenka xaaladahooda xaydku waa afar xaaladood.

1. Mid hadda xaydku bilaabay (Mubtadi' ah).
2. Mid 3 ilaa 4 jeer heshay dhiiga caadada (Muctaadah).
3. Mid taqaan noocyadiisa, xanuunkiisa, midabyadiisa (Mumayizah).
4. Mid aan kala saari karin ee ku wareersan, ama culimada wareerisa oo arinteedu isku murugsan tahay (Mutaxayirah, ama Muxayirah).

Labada u dambeeya ayaa masaaisha intooda badan ka yimaadaan gaar ahaan tan u dambaysa masaaisheedu waa is dhex gelayaan, mar nifaaska iyo xayd ayaa is dhex galaya, mar dhiig furan iyo xayd ayaa is dhex gelaya, waana in dhug loo lahaado masaa'ishan.

Waxaa imaanaya su'aalo badan, matalan haweenta mustaxaadada ah (dhiig furanka qabta) ma loo galmoon karaa? Mise looma galmoon karo?

Jamhuurka culimadu waxay qabaan in loo galmoon karo, lamana hayo xadiis ay ku caddahay in aan loo galmoon karin, Ilaahay wuxuu xarimay galmoodka haweenka xaydka qaba ee ma xarimin mustaxaada.

Culimada qaarkood waxay dheheen uma galmoonayo inuu sino ka cabsado mooyaane, laakiin sida saxiixa ah ee ay jamhuurka culimadu qabaan wuu u galmoon karaa, waxaase haboon in laga dhawrsado.

Waxaa suno ah in ay qubaysato salaad kasta, kumana waajibin sidii laga arkay ficilkii Faadumo oo saxaabiyad ahayd.

Waxaan halkaas ka dareemaynaa baahida weyn ee loo qabo in la fahmo axkaamta sharciga ah, sida dahaarada, Soonka, Salaadda, Zakada, Xajka, qof kasta oo muslim ah waxaa laga doonayaa in aanu diintiisa ka jaahil noqon, iyadoo maanta cilmiga barashadiisa aad loo fududeeyey oo qof cudur daar helaya uu yar yahay.

Qeebta 1aad

CAQIIDADA

- **Dhiig ku qubaysi**

Su'aasha 1aad: Hooyaday ayaa jirratey waxaan geeyey dhawr isbitaal wax ka soo rayn ahna kama helin, ugu dambayntii waxaan u geeyey wax sheege (curaafayste) wuxuuna yiri, "Ku qubayso dhiig ari." Way ku qabaysatay iyadoo jaahil ka ah xukunka sharciga ah ee arrintaas, haddaba kafaare gud miyaa nagu waajibay? Muxuuse yahay kafaare gudkaasi?

Jawaab: Ma bannaana curaafayste, saaxir, xidigiye iyo wax-sheege oo dhan, in loo tago oo la weydiiyo arrimo qaybka ku taxaluqa lagana rumaysto, waxayna arrintaasi ka mid tahay dambiyada waa weyn, Nabigu wuxuu yiri:

(مَنْ أَتَى عَرَّافًا فَسَأَلَهُ عَنْ شَيْءٍ لَمْ تُقْبَلْ لَهُ صَلاَةٌ أَرْبَعِينَ لَيْلَة)

"Qofkii u taga curraafayste oo wax su'aala, afartan cisho salaad lagama aqbalo."

Wuxuu kaloo rasuulku yiri:

(من أتى عرافا أو كاهنا فصدقه بما يقول فقد كفر بما أنزل على محمد)

"Qofkii u taga curraafayste ama kaahin kana rumaysta waxa ay u sheegaan wuxuu ku gaaloobay waxyigii lagu soo dejiyey Nabi Muxamed."

Dhiig ku qubaysigu asal ahaan waa ficil aad u xun, waana xaaraan najaaso ah mana bannaana in najaasooyinka la isku daaweeyo, Abu Daa'uud wuxuu sunankiisa ku qoray xaddiis Abuu Dardaa rasuulka ka warinayo oo ah:

Wuxuu yiri Nabigu:

[إن الله لم يجعل شفاءكم فيما حرم عليكم.]

"Allaah daawadiina ma gelin wixii uu idinka xaraantinimeeyey."

Haddaba waxaa ku waajiba inay Allaah u toobad keento oo aysan mar dambe falkaas u noqon, qofkii si dhab ah u toobad keena Allaah toobadiisa waa ka aqbalaa.

- **Waxa ay diintu ka qabto in mindi la dhigo ilmaha madixiisa**

Su'aasha 2aad: Dadka qaarkood ilmaha dhasha mindi ayay ag dhigaan, waxayna yiraahdaan jinniga ayay ka celinaysaa, haddaba ficilkaasi sax miyaa?

Jawaab: Ficilkaasi waa munkar aan asal diinta ku lahayn mana bannaana in la sameeyo, waxaa sharci ah in ilmaha looga cawdi billeeyo shayaadiinta iyadoo la magan gelinayo Allaah kalimadihiisa taamka ah lana oranayo: Allaah kalaamkiisa taamka ah ayaan kaa magan galinayaa shayaadiinta oo dhan.

Nabiga waxaa ka sugnaatay inuu sidaas yeelay oo labadii wiil oo Faadumo dhashay (Allaah ha ka raalli noqdee) uu magan gelin jirey Allaah kalaamkiisa taamka ah, waxaa sharci ah in Allaah loo baryo inuu ka ilaaliyo xumaan oo dhan, laakiin in la ag dhigo mindi ama alwaax iyo wixi la mid ah iyadoo la aaminayo inay jinka ka ilaalinayaan, waa arrin munkar ah oo aan bannaanayn, waxaa isaguna taas la mid ah waxa xirsiga lagu magacaabo oo ilmaha loo xiro mana bannaana.

Nabigu wuxuu yiri:

"Qofkii xirsi xirta Allaah kama siiyo waxa uu ka doonayo."

Waxa kale oo uu yiri Nabigu:

"Qofkii xirsi xirta Allaah ayuu cid kale cibaadadii la wadaajiyey (shirki ayuu la yimid)."

Waxaan Allaah waydiisanaynaa inuu muslimiinta dhammaan diintooda ku sugo oo fahansiiyo, dhammaanteenna uu naga nabad geliyo wax kasta oo khilaafsan shareecada daahirka ah.

- **Warqadaha uu ku qoran yahay magaca Allaah**

Su'aasha 3aad: Wargeysyada iyo waraaqaha kaleba qaarkood waxaan ku aragnaa aayado qur'aan ah oo ku qoran, sidoo kale warqadaha la isu diro bilowgooda waxaa ku qoran bisinka, haddaba sidee ka yeelaynaa aayadahaas qur'aanka ah, marka aan wargeysyadaas ama waraaqahaas kale dantayada ka boganno, ma jeexjeexaynaa, mise waan gubaynaa, sidee u galaynaa?

Jawaab: Waxaa waajib ah waraaqahaas markii laga kaaftoomo in la xafido ama la gubo ama lagu duugo meel nadiif ah, iyadoo la qaddarinayo aayadaha qur'aanka ah iyo magacyada Allaah, lagana ilaalinayo in la liido, mana bannaana in qashinka lagu rido ama suuqa dhexdiisa lagu tuuro ama laga dhigto fayl waraaqaha lagu kaydiyo, sidoo kale ma bannaana in laga dhigto gogol cuntada la saarto iyadoo intaas oo dhan ay ku jirto liidid la liidayo iyo xurmayn la'aan.

Qeebta 2aad

IS DAAHIRINTA

- **Maxay shareecadu ka qabtaa in niyada afka looga dhawaaqo?**

Su'aasha 1aad: Muxuu yahay xukunka in lagu dhawaaqo niyaysiga weysada iyo salaadda?

Jawaab: Arrintaas xukunkeedu waa bidco sababtoo ah lagama warin Nabiga iyo asxaabtiisii inay sidaas yeeleen, niyadana rugteedu waa qalbiga, markaas looma baahna in afka laga sheego.

- **Taabashada kitaabka qur'aanka ah weeso la'aan**

Su'aasha 2aad: Ma bannaan tahay kitaabka qur'aanka ah in aan gacanta ku qabsado oo akhriyo anigoo daahir ahayn?

Jawaab: Qofkii qur'aanka kor ka akhriya isagoo aan daahir ahayn dhib malahan haddii aanu qasli (jinaabo) qabin, haddii uu qasli jinaabo ah qabo ma bannaana inuu qur'aanka akhriyo xataa haddii uu kor ka akhrinayo, dhibna ma leh haddii uu bisinka qabsado ama uu yiraahdo haddii ay dhibaato ku dhacdo iyo wixii wardi ah oo quraanka laga soo qaatay oo kale.

- **Qoyaanka haweenka ka yimaada**

Su'aasha 3aad: Qoyaanka haweenka ka yimaada ma daahir baa mise waa nijaaso?

Jawaab: Sida macruufka ah dadka ahlu cilmiga ah waxay qabaan in wax kasta oo kasoo baxa labada marin ay nijaaso yihiin wixii aan manida ahayn, manidu waa daahir, wixii kale oo jurmi leh oo labada marin kasoo baxa waa nijaaso weysaduna way ku buraysaa, haddaba annagoo qaacidadaas ku soconayna waxa haweenka ka yimaada oo dheecaanka ah waa nijaaso waana waajib in laga weysaysto sidaas ayayna culimadu sheegeen markii ay baaris badan sameeyeen, arrintaas anigu walaac badan ayaan ka qabaa sababtoo ah haweenka qaarkood mar kasta qoyaankaas ayay isku arkaan, haddii uu qoyaanka sidaas joogto u yahay sida kaliya oo loo xalin karo waa in ay weysaystaan salaad kasta marka uu waqtigeedu galo, sida dadka aan kaadida ceshan karin oo kale.

Waxaan baaris wada samaynay dhakhaatiir ku takhasustay arrimahaas waxaana ogaaday in haddii dheecaankaasi ka imanayo kaadi haysta uu nijaaso yahay sidaan horayba u soo sheegnay, haddiise uu ka imanyo halka ilmuhu ka soo baxaan (riximka) waa laga weysaysanayaa nijaasana ma ahan oo meeshii uu gaaro in laga dhaqo waajib ma ahan.

- **Weysada jirka oo dufan leh**

Su'aasha 4aad: Ma bannaan tahay in la weysaysto iyadoo dufan ama kareem jirku leeyahay?

Jawaab: Dhib kuma sugna in la weysaysto iyadoo jirku dufan leeyahay waxaase shardi ah inuusan dufankaasi ahayn mid adag oo jirka u diidaya inay biyuhu gaaraan. Haddii dufankaasi yahay mid adag oo jirka ka hor istaagaya inay biyuhu gaaraan, waxaa waajiba in la iska tirtiro dufankaas.

- **Waajib miyaa inay haweenku geedkooda gudihiisa mayraan?**

Su'aasha 5aad: Labo hablood ayaa ku dooday markay is daahirinayaan waajib inay ku tahay inay geedka faraha geliyaan oo ay gudihiisa soo dhaqaan, iyo inay kor gacanta ka marinayaan oo kaliya.

Jawaab: Sida saxiixa ah arrintaasi waajib ma ahan wayse bannaan tahay.

- **Qof aan jinaabada ka mayran karin**

Su'aasha 6aad: Sidee ayuu xukunkeedu noqonayaa haweeney uu ninkeedu u galmoonayo iyadoon awoodi karin inay qubaysato, xaaladdeeda oo sidaas ah ninku inuu u galmoodo karaahiyo ma noqonaysaa? Booraysi ma loo ogol yahay haween jinaabo qabta haddii ay ka cabsanayso inay salaaddu ka tagto inta ay mayranayso?

Jawaab: Ruuxa jinaabada qabaa rag iyo dumar kuu doono ha noqdee, haddii uu biyo waayo ama uu biyaha ka cabsado inuu dhib ka soo gaaro, booraysi ayuu ku tukanayaa karaahiyona ma ahan ninku inuu xaaskiisa u galmoodo iyadoo xaaladdaasi jirto, wuuna u galmoonayaa sidoo kale way u bannaan tahay inuu u galmoodo iyagoo safar ku jira kaddibna ay booraystaan.

- **Haweeney xanuunsan oo aan awoodin qubays**

Su'aasha 7aad: Naag ayaa indhaha ka bukootay aadna way u cuslaatay qubaysna ma awooddo, isla markaasna ninkeeda ayaa u galmooda, haddaba miyay bannaan tahay inay jirkeeda caafimaadka qaba mayrto madaxana ka booraysato?

Jawaab: Haddii aysan awoodin inay qubaysato biyahoo qabow ama kulayl iyo wixi la mid ah way u bannaan tahay inay booraysato waqtiga salaadda sida ay qabaan jamhuurka culimadu.

- **Matagga ilmaha yar yar**

Su'aasha 8aad: Ma lagu tukan karaa maro ilmo yar oo naas nuug ah ku matagay?

Jawaab: Waxaa haboon in lagu rusheeyo biyo haddii ilmahaasi naas kaliya nuugo oo aanu cunto cunin sida kaadidiisa oo kale, lagumana tukan karo iyadoon biyo lagu rushayn.

- **Ilmo loo istijeeyey weysadu ma ku buraysaa?**

Su'aasha 9aad: Haddii aan caruurta aan dhalay u qubeeyo una istijeeyo weysadii ma iga buraysaa?

Jawaab: Ruuxii taabta cawro aan tiisa ahayn shahwo ahaan weysadu way ka buraysaa waxaase la isku khilaafsan yahay haddii loo taabto ula jeeddo aan shahwo ahayn, sida raajixa ah ilmo yar oo loo istijeeyo cawradooda oo la taabto weysadu kuma burayso waayo ilmaha cawradoodu ma ahan meel shahwo iyo tuhunkeedba laga filayo, weysada buristeeduna waa mashaqo iyo hawl inteeda le'eg,

haddii ay arintaasi jirto oo ilmaha cawradoodu weysada jabiso waxaa laga ogaan lahaa saxaabadii iyo dadkii ka dambeeyey.

- **Shakiga weysada**

Su'aasha 10aad: Muxuu yahay xukunka haddii qof ku shakiyo inay weysadu ka burtay iyo in kale?

Jawaab: Haddii qof ku shakiyo inay weysadii ka burtay iyo in kale, shakiga wuu tuurayaa wuxuuna u qaadanayaa in weysadii u dhawran tahay, waayo asal ahaan wuu weeso qabay oo markaas shakiga weeso ku buri mayso, waxaana u daliil ah qowlka Nabiga markii la weydiiyey nin salaadda dhexdeeda wax is moodsiiya, uuna yiri:

"Yuusan salaadda ka bixin ilaa uu codkeeda maqlo ama urkeeda dareemo."

Nabigu wuxuu u caddeeyey in daahir ahaanshuhu asal yahay ilaa laga xaqiijiyo wax buriyey, arintuna inta ay shaki ku siman tahay weysadu kuma burayso, wuuna ku tukan karaa weysadaas kuna dawaafi karaa kacbada qur'aankana wuu akhrin karaa, taas ayaana asal ah, Allaah mahadi ha ka gaartee waxay arintaani tusinaysaa diinta Islaamka waasacnimadeeda iyo fudaydkeeda.

- **Najaasada qallalan dhib ma keento**

Su'aasha 11aad: Kaadida qalalan dharka ma nijaasaysaa, matalan haddii ilmaha yari ku kaadsho dhulka oo kaadidii ay meeshaas ku qalasho iyadoo aan laga mayrin oo markaas kaddib qof inta yimaado ku fariisto isagoo aan qoyanayn, nijaaso miyaa ka soo gaaraysa?

Jawaab: Dhib ma keento nijaaso qalalan haddii ay taabato dharka ama jirka oo qalalan, sidoo kale dhib ma lahan in musqusha oo qallalan cago caddaan lagu galo haddii luguhu qalalan yihiin, nijaasaduna waxay ku gudubtaa qoyaanka.

- **Wajiga iyo gacmaha oo saabuun lagu mayro weysada**

Su'aasha 12aad: Muxuu yahay xukunka in wajiga iyo gacmaha lagu mayro saabuun marka la weyseysanayo?

Jawaab: Saabuun lagu mayro wajiga iyo gacmaha marka la weysaysanayo ma ahan arrin sharciga waafaqsan waana xad gudub iyo kallifaad, Nabiguna wuxuu yiri:

"Waa halaagsameen kuwa is kalifa, waa halaagsameen kuwa is kalifa," saddex goor ayuu ku cel celiyey.

Haddii gacmuhu leeyihiin wasakh saabuun iyo wixi la mid ah mooyee wax kale aan ku go'ayn markaas way bannaan tahay in la isticmaalo, laakiin in caado laga dhigto ma bannaana oo waxay noqonaysaa is kalifid iyo bidco.

- **Dhunkashadu weysada ma buriso**

Su'aasha 13aad: Ninkaygu mar kasta oo uu guriga ka baxayo wuu idhunkadaa, xataa haddii uu salaadda jamaacada ee Masjidka aadayo, mar marka qaarkoodna waxaan dareemaa inuu shahwo ahaan ii dhunkanayo, weysadiisa xukunkeedu sidee ayuu noqonayaa?

Jawaab: Caa'isha Alle ha ka raali noqdee waxaa laga wariyey inay tiri:

"Nabigu wuxuu dhunkaday qaar xaasaskiisa ka mid ah kaddibna salaadda ayuu aaday isagoon weysaysan."

Xaddiiskaani wuxuu bayaaninayaa haweenka dhunkashadooda iyo taabashadooda, haddaba weysadu maku buraysaa mise kuma burayso? Culimada – Allaah ha u naxariistee – way isku khilaafeen arintaan, qaarkood waxay qabaan in weysadu ku burayso xaalad kastaba haddii haweenta la taabto, qaar kalena waxay qabaan haddii uu shahwo u taabto way ka buraysaa, haddii kalase kama burayso, qaar kalena waxay qabaan inaysan weysadu taabasho iyo dhunkasho ku burayn xaalad kasta, waana sida raajixa ah, macnaha haddii ninku xaaskiisa dhunkado ama gacanteeda taabto waxyaalaha weysada buriyana aanay ka iman, weysadii waa u dhowran tahay isaga iyo xaaskiisaba, asal ahaan ayaana loo tix gelinayaa in weysadiisii u dhowran tahay ilaa la helo daliil cad oo ah wax weysadii buriyey, kitaabka Allaah iyo sunnada Nabiga midna laguma hayo daliil sheegaya haweenka taabashadooda in weysadu ku burto, sidaas darteed taabashada haweenta si toos ah loo taabto iyadoon jirkeeda wax kaa xigin ama la dhunkado weysadu kuma burayso.

DHIIGGA CAADADA IYO KAN DHALMADA

- **Haddii haweeney caado qabtaa ay weydo biyo ay isku daahiriso**

Su'aasha 1aad: Haweeney caadadiii ka go'day ayaa waxay weydey biyo ay isku daahiriso, iyadoo xaaladdaas ku sugan ma u bannaan tahay inuu ninkeedu u galmoodo, shardi la'aan?

Jawaab: Haddii haweenta dhiiggu ka go'o ayna awooddo inay mayrato uma bannaana inuu ninkeedu u galmoodo ilaa ay ka mayrato, haddiise aanay awoodin way booraysanaysaa waxaana sidaa qaba mad-habta jamhuurka sida Maalik, Axmed iyo Shaafici, sidaas oo kalena waxaa laga wariyey dhawr iyo toban saxaabada ka mid ah oo ay ka mid yihiin, Abuubakar, Cumar, Cali iyo Cismaan Allaah ha ka raali noqdee, qur'aankuna sidaas ayuu caddaynayaa oo Allaah wuxuu yiri:

*

"Ha u galmoonina haweenka ilaa uu dhiiggu ka go'o, haddii ay is daahiriyaan (ka qubaystaan dhiigga), uga galmooda halkii uu Alle idin faray."

Mujaahid wuxuu yiri: () waxaa loola jeedaa ilaa uu dhiiggu ka go'ayo tan kalena () waxaa loola jeedaa markii ay biyo ku mayrtaan, xaqiiqduna waa sidaas.

Xaaraantinimaynta la xaaraantinimeeyey haweenka dhiigga qaba galmoodkoodu ma ahan mid ku suulaaya qubays iyo wax la mid ah, wuxuuse ku suulayaa dhiigga go'itaankiisa, marka uu dhiiggu go'o waxaa shardi ah inay ka qubaystaan inta aan loo galmooon, kaddibna haweenka waa loo galmoon karaa.

- **Dhibcaha dhiigga marka la daahir noqdo kaddib**

Su'aasha 2aad: Qof dumar ah ayaa markii ay dhashay oo daahir noqotay laba cisho kaddib isku aragtay dhibco dhiig ah, haddaba maxay falaysaa? Miyay iska daynaysaa salaadda iyo soonka?

Jawaab: Mashaakilka haweenka ee la xiriira dhiigga caadada iyo kan dhalmada wuxuu noqday bad aan xeeb lahayn, sababaha arrintaas keenayna waxaa ka mid ah isticmaalka kiniinka uuraysiga iyo dhiigga caadada lagaga hor tago, qarniyadii inaga horreeyey mashaakilkaan faraha badan ma ay qabi jirin inkastoo ilaa iyo markii Nabi Muxamed la soo saaray amase markii dhulka guudkiisa haween lagu arkay mashaakilkani uu jirey, haddana sidaan maanta uu u badan yahay oo qofku ku wareerayo marna ma ahayn, hase yeeshee qaacidada caamka ah ayaan raacaynaa.

Haweentu haddii ay daahir noqoto oo ay aragto calaamadihii lagu yaqiinsan jirey inay caadadii ama dhiiggii dhalmadu ka go'ay, calaamadahaas waxaan ula jeedaa dareeraha cad ee ka yimaada oo ay ku gartaan inay daahir noqdeen, markaas kaddib wixii ay isku aragto oo calow ah ama dhibic dhiiga ah ama qoyaan, waxaas oo dhami wax kasoo qaad maleh salaad iyo soon iyo galmoodna u diidi mayaan, sababtoo ah ma'ahan dhiiggii caadada.

Ummu Caddiya Alle haka raalli noqdee waxay tiri:

"Waxba kama aanan soo qaadi jirin calowga iyo hurdiga." Waxaa wariyey Bukhaari.

Abu Daawuudna wuxuu ku siyaadiyey, "markaan daahir noqonno," senedkiisuna waa saxiix.

Sidaas awgeed waxaan leenahay wax kasta oo waxyaalahaas aan soo sheegnay ah oo ka dambeeya daahir noqoshada hubaasha ah waxba ma yeelayaan dumarka salaad iyo soon iyo galmoodka ninkeeda kama hor istaagayaan, waxaase waajiba inaysan deg degin ilaa ay ka aragto calaamadaha lagu daahir noqdo, waayo haweenka qaarkood haddii dhiiggu ka go'o horay ayay ka qubaystaan iyagoon arag calaamaddii lagu garanayey daahir noqoshada, haweenkii saxaabada ahaa waxay hooyadii mu'miniinta ee Caa'isha usii dhiibi jireen suuf dhiig lagu soo tiray, markaas ayay ku dhihi jirtey ha deg degina ilaa aad ka aragtaan biyaha cad.

- **Taabashada musxafka haween aan daahir ahayn**

Su'aasha 3aad: Muxuu yahay xukunka in haweeney caado qabtaa ay musxafka taabato iyo inay qur'aan akhriso?

Jawaab: Culimadu saddex ra'yi ayay ka qabaan in haween caado qabtaa ay qur'aan kor ka akhriso iyadoon musxafka taaban;

Qaybta saddexaad: Waxay qabaan in arrinta la kala qaado oo ay quraanka akhrin karto haddii ay duruuf u keento, sida haddii ay macalimad tahay oo arday wax barayso ama iyadu ardayad tahay oo ay baranayso iyadoo imtixaan isu diyaarinaysa waxayna shardi ka dhigeen inay kor ka akhriso iyadoon kitaabka taabanayn, haddiise aysan jirin duruuf ku kallifaysa uma bannaana inay quraanka akhriso.

Ibnu Taymiya wuxuu yiri: Sunnada Nabiga kuma sugna xaddiis saxiix ah oo caddaynaya in aysan bannaanayn in haweenka caadada qabaa aysan qur'aanka akhrin.

Aniga waxaa ila qumman oo aan doortay inay haweenta caadada qabtaa qur'aanka akhriso haddii ay duruufi ku kallifto haddii kalese uma bannaana inay akhriso waxayna booskiisii ku beddelan kartaa tasbiixsiga iyo wardiga iyo wixii lamid ah.

- **Umushu haddii ay daahir noqoto afartanka ka hor**

Su'aasha 4aad: Umushu afartanka inta ay ka baxayso miyay sugaysaa oo soon salaad la iman mayso, mise arrintu waxay ku xiran tahay dhiigga go'iddiisa oo markii dhiiggu ka go'o way isdaahirinaysaa oo tukanaysaa, waase imisa muddada ugu yar ee ay ku daahir noqon karto?

Jawaab: Umuluhu ma lahan waqti u go'an balse inta uu dhiiggu ka socdo way u kaadinaysaa oo tukan mayso soomina mayso ninkeeduna u galmoon mayo, markii ay daahir noqoto afartanka ka horba ha ahaatee xataa haddii toban cisho ama shan cisho ay dhallan tahay way tukanaysaa oo soomaysaa ninkeeduna waa u galmoon karaa, dhibna kuma sugna.

Hadal iyo gunaanadkiis dhiigga dhalmadu waa wax jira axkaamtiisuna waxay ku taxaluqdaa socodka dhiigga iyo go'itaankiisa, markii uu dhiiggu socdo axkaamtiisii way sugan tahay, markii uu go'ana xukunkiisii waa go'ay oo waa laga daahir noqday, hase ahaatee haddii waqtigiisu ka bato 60 cisho xukunkeedu wuxuu noqonayaa mustaxaado (haweenka aan dhiiggu ka go'in) waxayna ka joogaysaa soonkii iyo salaaddii iyo galmoodkii waqtigii ay heli jirtey caadada (iyadoo qiyaasaysa intii maalmood oo uu hayn jirey dhiiggaasi) kaddibna way mayranaysaa oo tukanaysaa.

- **Haweenka uurka leh dhiig caado ma helaan?**

Su'aasha 5aad: Haweenka uurka leh dhiig caado ma helaan?

Jawaab: Haweeney uur lihi caado ma hesho siduu imaamu Axmed sheegay, waxayna macruuf ku yihiin haweenka uurka leh inuu dhiigga caadadu ka go'o sideedana dhiigga caadadu sida ay ahlu cilmigu sheegeen Allaah wuxuu ugu talagalay oo u abuuray inay ilmaha uurka ku jiraa quutaan, markii ay haweentu uur yeelato dhiiggaasu waa go'aa oo bannaaka uma soo baxo, waxaase jira haweenka qaarkood dhiiggaasu in aanu ka joogsan oo uga yimaado siduu uga iman jirey intaanay uurka yeelan, haddii ay arrintaasi dhacdo dhiiggaasu wuxuu noqonayaa dhiiggii caadada maadaama aanu uurkii wax saamayn ah ku yeelan oo u yimid sidii uu uurka ka hor u iman jirey.

Waxaa isna jira dhiig kale oo isna haweenka uurka leh qaarkood si lama filaan ah uga yimaada inta badanna sabab ayuu eersadaa, sida haddii ay haweenta uurka lihi wax culus qaaddo ama ay jugi gaarto iwm, dhiigga t aynkaas oo kale ah dhiig caado ma ahan, sababtiisana salaad iyo soon toona loo dayn mayo.

- **Dhiig ayaa ka yimid markay qubaysatay kaddib**

Su'aasha 6aad: Waxaa dhacda marmarka qaarkood marka aan ka mayrto dhiigga caadada in uu dhiig aad u yari iga yimaado, kaddibna wax dambe oo dhiig ahi igama yimaado sida qaalibka ahna dhiiggu wuxuu iga socdaa shan cisho, iminka waxaan doonayaa in la ii kala caddeeyo in aan ku ekaanayo shantaas maalmood oo wixii ka badan aanan tirsanayn soon iyo salaadna uga tagayn iyo in aan

maalintaas ku tirinayo in aan caado qabo oo aanan soon iyo salaad la imaanayn, iyadoo arrintaas aan isku arko markaan laba jeer ama saddex jeer dhiig helo kaddib?

Jawaab: Marka aad is daahirisay haddii waxa aad isku aragtay uu midabkoodu i-alaw ama jaalle yahay, dhibaato malahan oo kama duwana kaadida xukun uhaan, haddiise uu dhiig caadi ahi kaa yimaado waxaa laga soo qaadayaa in uu kii caadada yahay waxaana kugu waajib ah in aad mar labaad ka inayrato, Caa'isha Alle haka raalli noqdee waxay tiri, "Waxba kama aannan soo qaadi jirin (waxa midabkoodu yahay) calowga iyo jaallaha ee naga yimaada marka aan caadada ka daahir noqono."

- **Kala go'a dhiigga caadada**

Su'aasha 7aad: Waxaa dhacda dhiigga caadadu inuu iga socdo afar cisho kaddibna uu go'o oo iga maqnaado saddex cisho, maalinta todobaad ayuu mar kale igu soo noqdaa isagoo intii hore ka khafiifsan, markaas kaddibna wuxuu midabkiisu isu bedelaa hurdi ilaa laga gaaro maalinta 13aad, waxaan idinka rajaynayaa in aad ii bayaanisaan arrjntaas xukunkeeda sharciga ah?

Jawaab: Maalmaha aad sheegtay oo dhiiggu kaa socdey dhammaantood waxaa lagu tirinayaa in aad dhiig caado qabtey, waxaana kugu waajiba in aad ka joogsatid salaadda iyo soonka, ninkaaguna kuuma galmoon karo.

Waxaa kaloo kugu waajiba afarta maalmood oo hore markay dhamaato in aad is daahirisid markaasna aad dib u bilawdid salaaddii, ninkaaguna wuu kuu galmoon karaa waadna soomi kartaa, haddii ay Ramadaan tahay waxaa kugu waajibaya in aad soontid mudadaas aan xusnay oo u dhexaysa afarta cisho oo hore iyo lixda cisho oo dambe.

Markii ay dhamaato lixda maalmood oo dambe waxaa kugu waajiba in aad qubaysatid oo aad salaaddii iyo soonkii bilowdid, sida waqtiyada kale ee aad daahirka tahay oo kale, sababtoo ah dhiigga caadadu maalmaha uu socdo way kordhaan ama way yaraadaan, waxaa kaloo dhacda maalmaha dhiiggu socdo inaysan isku xigsan ama ay isku xigsadaan, Aalaah ha ina waafajiyo dhammaanteen waxa uu jecel yahay oo ka raalli yahay, hana nagu irsaaqo annaga iyo muslimiinta oo dhan fahamka diinta iyo xaqa oo lagu sugnaado.

- **Haween caado qabta ma ku sujuudaysaa qur'aan akhriska?**

Su'aasha 8aad: Haween caado qabta ma ku sujuudaysaa qur'aan arkhrinta (aayadaha sujuudda)?

Jawaab: Ibnu Mundir sida uu xusay waa la isku khilaafay arrintaan Caddaa iyo Abu qilaaba, Zuhri, Saciid bin Jubayr, Xasanul Bisri, Ibraahiim iyo Qataada intaas oo dhan waxay yiraahdeen kuma sujuudayso qur'aan akhrinta, waxaa sidaas oo kale laga wariyey: Imaamu Shaafici, Maalik, Nawawi, Thowri iyo waliba culimada ra'yiga wax ku cabirta.

Cismaan bin Cafaan & waxaa laga wariyey inuu yiri: Madaxa ayay in yar foorarinaysaa (Macnaha in yar ayay madaxa hoos u dhigaysaa sidii iyadoo sujuudaysa oo kale).

- **Xukunka dhiigga yimaada dhalmada ka hor shan cisho**

Su'aasha 9aad: Haweeney uur leh ayaa waxaa ka yimid dhiig, shan cisho ka hor intaysan dhalin iyadoo lagu jiro bil Ramadaan, haddaba dhiiggaas xukunkiisu dhiig caado iyo dhiig dhalmo kee ayuu noqonayaa?

Jawaab: Haddii arinku yahay sida loo sheegay 00 ay dhiig isku aragtay iyadoo uur leh shan cisho dhalmadeeda ka hor, waxaa la eegayaa waqtigaas dhiiggu yimid in ay dareemaysey calaamadihii dhalmada oo ah foosha iyo minka 00 furma, haddii aysan dareemin calaamadahaas dhiigga ka yimid wuxuu noqonayaa dhiig jirro ku yimid cibaadadana uga tagi mayso balse way soomaysaa oo tukanaysaa, haddiise markii dhiiggaasi ka yimid ay dareemaysey fool iyo calaamadaha la midka ee tusiya soo dhawaanshaha dhalmada, markaas dhiiggaasi wuxuu noqonayaa dhiiggii dhalmada, waxayna ka joogsanaysaa salaadda iyo soonka, kaddibna marka ay dhasho 00 ay daahir noqoto ayay soonka kaliya qallaynaysaa salaaddana ma qalaynayso

- **Kiniinka joojiya dhiigga caadada**

Su'aasha 10aad: Ma bannaan tahay in haweenku isticmaalaan kiniinka caadada hakiya marka ay xajinayaan si uu uga ilaaliyo inay dhiig helaan?

Jawaab: Haweentu marka ay xajinayso way u bannaan tahay inay isticmaasho kiniinkaas si aan dhiigga caadadu ugu dhicin, waxaase laga doonayaa marka hore inay kala tashato dhakhtar arimahaas ku takhasusay in aan kiniinkaasi caafimaadkeeda wax gaarsiinayn , bisha Ramadaanna waa sidaas oo kale haddii ay jeclaysato inay dadka la soonto.

- **Haweenta caadada qabta iyo Salaadda**

Su'aasha 11aad: Sidee ayaan yeelayaa haddii aan dhiig caado helo aniga oo salaad ku jira, salaaddaas dib miyaan ka qallaynayaa?

Jawaab: Haddii dhiigga caadadu yimaado marka salaadda waqtigeedu galo kaddib, sida haddii ay dhiig hesho nus-saac kaddib marka hoosku wareego (salaadda duhur), salaaddaas maadaama waqtigeedu galay iyadoo daahir ah way qallaynaysaa markii ay daahir noqoto, Allaahna wuxuu yiri:

(Salaaddu mu'miniinta waxay ku tahay waajib waqtiyaysan (muddaysan). Inta ay caadada qabto salaadaha dhaafa ma qallaynayso waxaana u daliil ah xadiiskii dheeraa oo ay ku jirtey:

(Miyaysan salaadda iyo soonka ka tagin markay caado hesho).

Culimadu waxay isku raaceen inaysan qallaynayn salaadihii ka tagey mudadii ay dhiigga qabtey, laakiin haddii ay daahir noqoto iyadoo salaadda waqtigeeda ay ka harsan tahay inta ragcad iyo wixii ka badan laga tukan karo, salaaddaas waa lagu leeyahay wayna tukanaysaa isla waqtigaas, waxaana u daliil ah qawlka Nabiga ee ahaa:

(Qofkii soo gaara hal ragcad oo casarka ka mid ah inta aan qorraxdu dhicin, wuu soo gaaray casarkii).

Haddii ay daahir noqoto waqtiga salaadda casar, salaaddaas way tukanaysaaa, waxaa taas la mid ah haddii ay daahir noqoto intaysan qorraxdu soo bixin oo soo bixitaankeedii uu ka dhiman yahay inta laga tukado hal ragcad salaaddaasi waa ku waajib wayna tukanaysaa.

- **Taabashada Musxafka**

Su'aasha 12aad: Waxaan ahay macalimad (hablaha qur'aanka barta), haddaba ma ii bannaan tahay anigoo macduur ah in aan taabto musxafka ama kitaab tafsiir ah, iyadoo haddii aanan mudadaas akhrin qur'aanka uu naga kala go'ayo darsigu, mase bannaan tahay in aan ka qayb qaato tartanka qur'aanka kariimka ah anigoon garanayn abaal marinta la bixinayo meesha laga keenay?

Jawaab: Waa ka xaaraan inuu kitaabka qur'aanka ah taabto qof aan weeso qabin iyo haweenku marka ay macduurka yihiin iyo qof qasli (jinaabo) qaba, haweenta macallimadda ah waxaa u bannaan inta ay macduurka tahay inay ardayda farto inay qur'aanka akhriyaan iyaduna musxafka ay kala socoto iyadoo marka uu baalku dhamaado ku soo rogaysa qori ama waxa la mid ah, oo markaas khaladka ay ka saxdo kalimad.

Kutubta tafsiirka ah iyo kutubta kale oo aayado qur'aan ah ku qoran yihiin way taaban karaysaa, culimada qaaarkoodna waxayba banneeyeen inay qur'aanka akhriso haddii ay ka cabsato inay illowdo.

Tartanka qur'aanka kariimka ah in laga qayb qaato way bannaan tahay waayo faa'iido ayaa ku jirta oo dadku waxay ahmiyad siinayaan barashada kitaabka Allaah, sidoo kale abaal-marinta tartankaas laga bixinayo way bannaan tahay in la qaato, haddii wax xaaraan ah ku jiraan waxaa dambigeeda xambaaraya ciddii keentay.

- **Qoritaanka Qur'aanka haween caado qabto**

Su'aasha 13aad: Ma u bannaan tahay haweenta caadada qabta inay aayado qur'aan ah akhriso iyadoo soo daliilsanaysa ama tusaale ahaan u soo qaadanaysa, mase n bannaan tahay inay qorto aayado qur'aan ah ama axaaddiis?

Jawaab: Dhib malaha haweenta caadada qabtaa inay akhriso kitaabo ay ku qoran yihiin aayado qur'aan ah ama aayado qur'aan ah iyo tafsiirkood, sidoo kalena way u bannaan tahay markii maqaal iwm ay qorayso inay ku qorto aayado qur'aan ah, sidoo kale quraanka way soo daliilsan kartaa, ama marka ay ducaysanayso aayadaha qur'aanka ah ee ducada ah way ku ducaysan kartaa, sideedana arimahaas aan soo xusnay laguma tiriyo akhris, waxaa kaloo u bannaan inay qaadato kutubta tafsiirka qur'aanka haddii ay u baahato.

- **Ha deg degin**

Su'aasha 14aad: Waxaa caado ii ah in dhiigga caadadu iga socdo bishiiba 7 ilaa 8 casho, marmarka qaarkood maalinta 7aad ayaa dhiiggu iga joogsadaa, laakiin iskuma arko calaamadihii daahir noqoshada, muxuu noqonayaa xukunka salaadda iyo soonka iyo galmoodka ee maalintaas?

Jawaab: Ha deg degin ilaa aad ka aragtid oo uu kaa yimaado axalka cad oo ah calaamadda ay haweenku ku ogaadaan inay daahir noqdeen, dhiigga joogsigiisu ma ahan daahirnimo, waxaadse daahir noqonaysaa marka waqtigii dhiigga caadadu dhamaado sida caadada kuu ahaan jirtey kaddibna aad aragto calaamadihii daahirnimada.

- **Dhiigga yimaada inta aan la gaarin waqtigii caadada**

Su'aasha 15aad: Waxaa dhacda inuu dhiig iga yimaado 3 ama 4 cisho ka hor intaan la gaarin waqtigii caadiga ahaa ee aan heli jirey, aniguna arrintaas waan ku dhibtoodaa oo maxaaan kayeela in aan salaad tukanayo iyo in kale?

Jawaab: Haweentu haddii ay taqaan dhiigga caadada oo ay ku garato, tiro ama ' midab ama waqti, waxay salaadda ka tageysaa waqtigeedii caadada ay heli jirtey, markii waqtigaasi dhamaadana way mayranaysaa oo tukanaysaa j salaaddii.

Dhiigga ka soo hor maray dhiiggii caadada waa dhiig jirro ku yimid ee ma ahan dhiig caado isaga dartiisna looga tagi mayo salaad iyo soon, waxaana ku waajiba inay dhiigga iska dhaqdo marka salaad walba waqtigeedu galo, ayna xirato suufka dhiigga celiya(xafaayad), kaddibna ay u weysaysato salaad kasta oo ay sidaas ku tukato xataa haddii dhiig ka soconayo, waxayna la mid tahay xukun ahaan haweenka dhiig furanka qaba, haddii ay salaad uga tagtay dhiiggaas dartiis waxaa haboon inay qallayso salaaddaas dhibna kala kulmi mayso haddii Alle idmo.

- **Haweentu haddii ay casarka daahir noqoto salaaddii duhur way qallaynaysaa.**

Su'aasha 16aad: Haddii haweeney caado qabtaa ay ka daahir noqoto dhiiggii caadada casarka, waajib miyay ku tahay inay soo qallayso salaadii subax iyo tii duhurba, haddiise ay daahir noqoto waqtiga salaadda cishaha miyey qallaynaysaa salaaddii maqribka iyo casarka?

Jawaab: Haddii ay haweentu daahir noqoto casarkii intaan maqribka la gaarin, waxaa laga doonayaa in ay tukato salaaddii casar iyo tii duhurba sababtoo ah labadaas salaadood waa la kulmiyaa oo hal waqti ayaa la tukan karaa (haddii ay duruufi keento), sidoo kalena haddii ay daahir noqoto habeenka aakhirkiisa waxay qallaynaysaa maqribkii iyo cishihii sababtoo ah iyagana waa la kulmiyaa oo hal waqti ayaa la isku tukadaa, haddii ay dhiig caado hesho iyadoo markaas salaad waqtigeed la joogo, waxaa ku waajiba inay salaadaas qallayso markii ay daahir noqoto.

- **Haddii ay haweenta ilmuhu ka dilmaan bisha 3aad**

Su'aasha 17aad: Anigoo leh uur saddex bilood ah ayaa ilmihii iga dilmeen oo iga soo ilaateen mana aanan tukan ilaa aan ka daahir noqday, waxaa la igu yiri waxay ahayd in aad salaadda tukatid, haddaba sidee ayaan yeelayaa haddii aanan garanayn tirada maalmahaas?

Jawaab: Sida macruufka culimada dhexdooda haweenta haddii ilmuhu ka soo ilhacaan iyadoo saddex bilood ah ma ay tukanayso salaad, sababtoo ah ilmuhu marba haddii ay yeeshaan suurad bani'aadam oo markaas dilan ku dhaco dhiigga ka soconaya haweenta wuxuu noqonayaa nifaas (dhiig ilhalmo) kumana tukanayso.

Culimadu waxay yiraahdeen ilmuhu inay suurad insaan yeesheen waxaa lagu ogaan karaa inta maalmood oo uurka ay ku jireen, haddii ilmuhu gaaro kow iyo sideetan (81) cisho waxaa la ogaanayaa inuu yeeshay suurad bani'aadam, muddodaasi way ka yar tahay saddex bilood, haddii ay haweentu xaqiijiso in ilmhu ka dilmeen bishii sadexaad dhiigga ka yimid wuu noqonayaa dhiig dhalmo (nifaas) laakiin haddii inta ka horraysa siddeetan cisho dhiig ka furmo dhiiggaasi wuxuu noqonayaa dhiig jirro ah (fasaad) salaaddana u deynmayso dhiiggaas dartiis, haweenta su'aasha na weydiisey iyadu dib ha isugu noqoto oo ha eegto haddii ay ilmuhu ka dilmeen intaysan u buuxsamin siddeetan cisho way qalaynaysaa salaaddii, haddii aysan garanayn tirada inta cisho ee aysan tukan way dadaalaysaa waxayna qalaynaysaa tirada inta cisho ee malaheedu u bato in lagu leeyahay oo aanay salaad tukan.

- **Haddii dhiigga caadadu waqtigiisa dhaafo oo joogsan waayo**

Su'aasha 18aad: Haddii haweenta caadadu ay ka socon jirtey siddeed ama todaba cisho bil kasta kaddibna ay isku aragto mar ama Iabo jeer caadadii oo ka soconaysa intii ay ka socon jirtey in ka badan muxuu xukunkeedu noqonayaa?

Jawaab: Haddii haweentaas caadadu ka socon jirtey lix ama todaba cisho kaddibna ay mudadii dheeraato oo noqoto siddeed ama sagaal ama toban ama kow iyo toban cisho, way sugaysaa oo ma tukanayso ilaa ay ka daahir noqoto sababtoo ah nabigu M caadada uma xadidin waqti go'an, Allaahna wuxuu yiri:

*

"Waxay ku weydiinayaan caadada (haweenka) ee ku dheh waa wasakh."

Inta uu dhiiggaasi socdo haweentu sideeda ayay ku joogaysaa ilaa ay ka daahir noqoto oo mayrato salaaddana ay tukato, haddii bisha kale uu ka yimaado dhiiggii isagoo ka yar intii hore markii uu ka go'o way mayranaysaa oo is daahirinaysaa xataa isagoo ka soconayey in ka yar intii uu bishii hore ka socday, muhimaduna waxaa weeye haweentu inta uu dhiiggu ka soconayo in aysan tukan waana isku mid haddii uu ka socdey intii bishii hore uu ka socdey oo kale ama uu ka socdo in ka yar ama ka badan, markii ay daahir noqoto ayayna tukanaysaa.

SALAADDA

- **Haweeney uur leh oo aan kaadida ceshan karin salaadda ma ka tegaysaa?**

Su'aasha 1aad: Haweeney uur leh oo ku jirta bishii sagaalaad isla markaana kaadida aan ceshan karin daqiiqad kaliya, ayaa salaaddii iska deysey bishii ugu dambeysey, haddaba maxaa laga doonayaa haweentaas?

Jawaab: Haweeneydaas iyo wixii la mid ah uma bannaana inay salaadda ka tagaan waxaana ku waajiba in ay u tukato hadba sidii ay u tukan karto, salaad kasta marka waqtigeeda la gaaro waa inay xirato suufka dhiigga celiya (xafaayad iwm), sida haweenka dhiig furanka qaba oo kale waana inay salaad kasta marka waqtigeedu galo weysaysato oo tukato, salaad sunne ahna way ku tukan kartaa weysadaas, waxaa kaloo u bannaan inay kulmiso salaadaha duhurka iyo casarka sidoo kalena ay kulmiso maqribka iyo cishaha, Allaah wuxuu yiri:

(Alle ka cabsada inta aad kartaan).

Waxaa ku waajiba inay qalleyso salaadihii ay ka tagtay Allena u toobad keento subxaanahu wa tacaalaa, salaaddii ka tagtayna ay ka qoomamayso, go'aan adagna ay ku gaarto inaysan mar dambe u noqon doonin.

Allena wuxuu yiri:

(U toobadkeena (u noqda) xagga Allaah dhammaantiin mu'miniineey waad liibaanaysaane).

- **Salaad waqtigeed soo galay ayay caado heshay**

Su'aasha 2aad: Haddii ay haweentu caado hesho iyadoo salaad wakhtigeed soo galay, walise aan tukan miyay waajib ku tahay inay qallayso markay daahir noqoto, sidoo kalena haddii ay daahir noqoto iyadoo salaad waqtigeed la joogo?

Jawaab: Haweentu haddii ay caado hesho iyadoo salaad waqtigeed soo galay walise aan tukan waxaa ku waajiba inay salaaddaas qallayso markay daahir noqoto rasuulkuna wuxuu yiri:

(Ruuxii salaadda ragcad ku soo gaara salaaddaas wuu soo gaaray).

Sidaas darteed haddii ay haweentu waqtiga salaadda ka soo haleesho in ragcad laga tukado oo kale, kaddibna ay dhiig hesho inta aanay tukan waxaa ku waajiba inay qallayso markay daahir noqoto.

Tan labaad: Haddii ay caadadii ka daahir noqoto intaan salaadda waqtigeedu bixin waxaa ku waajiba inay salaaddaas qallayso (haddii salaaddaasi dhaafto), tusaale ahaan haddii ay daahir noqoto intaysan qorraxdu soo bixin wax yar oo inta ragcad laga tukado oo kale ah waxaa ku waajiba inay salaaddaas qallayso, sidoo kale haddii ay daahir noqoto habeenka kala barkiisa wax yar ka hor inta hal ragcad laga tukado oo kale, waxaa ku waajibaya inay qallayso salaaddii cishaha, haddiise ay daahir noqoto habeenka kala barkiisa kaddib kuma waajibayo inay cishihii qallayso, waxayna ka bilaabaysaa salaadda subax marka waqtigeeda la gaaro, Allaahna subxaanahu wa tacaalaa wuxuu yiri:

"Markii aad xasishaan salaadda ooga, waayo salaaddu mu'miniinta waxay ku tahay waajib waqtiyaysan (muddaysan)."

Qofna uma bannaana inuu salaadda waqtiga loo xadeeyey ka dib dhigo ama ka hor mariyo.

- **Haweenku ma tukan karaan salaad jamaaco ah?**

Su'aasha 3aad: Haweenku ma leeyihiin salaad jamaaco ah mise kali kali ayay u tukanayaan? Haddiise ay leeyihiin salaad jamaaco ah ma ii bannaan tahay in aan hablahayga la tukado salaadaha si ay u helaan ajarkii jamaacada?

Jawaab: Ragga waxaa ku waajiba inay salaadda jamaacada masaajidka soo xaadiraan, haweenka iyaga gurigooda inay ku tukadaan ayaa u khayr badan haddiise ay rabaan masaajidka iyo salaadda jamaacada waxaa haboon in aan loo diidin.

Haddii haweenku gurigooda joogaan jamaaco ahaan way u tukan karaan, haweenta tujinaysana safka ayay wax ka galaysaa oo horay usoo bixi mayso, jamaacadoodana kama helayaan fadligii jamaacada ragga oo kale.

Ninka uma bannaana inuu masaajidka iska daayo oo gurigiisa ku tujiyo haweenkiisa ama ehelkiisa, waayo ragga waxaa ku waajib ah inay masaajidka ku tukadaan salaadaha (shanta ah) ee la waajibiyey.

- **Haweenku ma adimi karaan, codkooduse cawro miyaa?**

Su'aasha 4aad: Ma u bannaan tahay haweenku inay adimaan, hadalkooduse cawro miyaa?

Jawaab: Haweenku ma adimi karaan sida saxiixa ah salaadooduna addin iyo aqimaad midna ma leh, Bukhaari wuxuu wariyey xadiis saxiix ah oo laga wariyey Asmaa bintu Yaziid waxayna tiri: Nabigu wuxuu yiri:

(Haweenka (salaaddoodu) ma leh, addin iyo aqimaad).

Lamana sheegin waagii Nabiga iyo waqtigii khulafadaba haweeney addin loo dhiibay ama adintay.

Haweenka hadalkooda oo dhan cawro ma ahan, waagii Nabiga haweenku Nabiga ayay u soo ashtakoon jireen, waxayna wax ka weydiin jireen cilmiga sharciga ah, xilligii khulafada iyo madaxdii ka dambeysey sidoo kale ayay yeeli jireen, raggana way salaami jireen salaantana way ka qaadi jireen, arintaasna laguma qoonsan jirin.

Waxaanse bannaanayn inay ragga kula hadlaan hadal jilicsan oo is jajabin ku jirto si aan raggu ugu fitnoobin Allaahna wuxuu yiri:

(Haweenka Nabigow ma tihidiin sida haweenka kale haddaadse dhawrsataan hadalka ha jilcinina si aysan idiin hunguriyeyn ragga laabta ka jirran, oo hadal wanaagsan ku hadla).

- **Labiska maro kaa xaaraan ah salaadda ayaa kaaga buraysa.**

Su'aasha 5aad: Haweeney ayaa waxay samaysatay maro ay salaadda kaliya ku tukato, maradaasina waxay ka mid tahay dharka ragga, haddaba ma u bannaan tahay inay ku tukato, mase soo galaysaaa isku shabihiddii ragga?

Jawaab: Haddii ay maradaasi tahay dharka ragga u gaarka ah waa ka xaaraan inay labisato ama salaad ku tukato, Nabigu wuu lacnaday haweenka ragga isu ekaysiiya iyo raga haweenka isu ekaysiiya, mana bannaana inay haweenku labistaan dharka ragga u gaarka ah ama raggu labisto dharka haweenka u gaarka ah.

Waxaa waajib ah in aan ogaanno waxa dharkaas lagu kala soocayo? Laguma kala soocayo dharka ragga iyo kan haweenka midab kaliya ee waxaa lagu soocaa midab iyo qaabka tolmada, haweenku way labisan karaan maro cad, haddii loo tolo habka dharkooda, haddiise ay caddaato marada haweentu xiratay inay ka mid tahay dharka ragga u gaarka ah, waa ka xaaraan salaadduna ugu ansixi mayso sida ay culimada qaarkood qabaan iyagoo shardi ka dhigay marada la isku asturayo inay noqoto mid sharciga ku bannaan.

Mas'aladaan culimadu way isku khilaafsan yihiin, culimada qaarkood waxay qabaan sida aan soo xusnayba inay maradu noqoto mid sharciga ku bannaan iyo qaar kale oo aan sidaas shardiyayn, qolada hore waxay soo daliilsadeen in asturidda cawradu tahay shardi ka mid ah shuruudaha salaadda ayna daruuri tahay waxa cawrada lagu asturayaa inay noqdaan wax uu Allaah oggol yahay, hadduusan oggolayna shardi ahaan ma noqonayaan wax cawro asturaya khilaafka ay la yimaadeen awgeed.

Qolada kale ee oranaysa way ku ansaxaysaa salaaddu iyadoo qofkaasi dambaabay waxay yiraahdeen maradu jirka way asturaysaa dambiguna waa baab kale oo ka baxsan salaadda, xaaladdu si kastaba ha noqotee qofka ku tukanaya maro ka xaaraan ah salaaddiisu waxay halis u tahay in aan laga aqbalin.

- **Haweenku rag ma tujin karaan?**

Su'aasha 6aad: Waxaan dhigtaa kulliyadda shareecada ninkaygana waa jaahil waana ka badiyaa diinta ee ma ii bannaan tahay in aan salaadda tujiyo oo imaam u noqdo?

Jawaab: Uma bannaana haweeney inay rag tujiso waana isku mid inuu yahay ninkeedii ama wiilkeeddii ama aabaheed.

Mana tujinayso xataa haddii ay Qur'aanka ka badiso in kastoo Nabigu yiri:

(Dadka waxaa tujinaya kan u Qur'aan badiya), haddana haweenku markay rag la joogaan ma soo galayaan xukunkaan, Allena wuxuu yiri:

(Kuwa xaqa rumeeyow yuuna yasin ragna rag kale waxay u dhowdahay inuu ka khayr badan yahaye, haweenna yaysan yasin haween waxay u dhow yihiin inay ka khayr badan yihiine). Allaah subxaanahu wa tacaalaa dadka wuxuu u qaybiyey laba qaybood oo kala ah rag iyo dumar sida aayadda kor ku xusan tilmaamayso, sidaas awgeed haweenku ma soo galayaan markii ay rag la joogaan xaddiiska Nabiga ee ah: (Dadka waxaa tujinaya kan u Qur'aan badiya).

- **Ma qallaynaysid salaaddii hore**

Su'aasha 7aad: Waxaan ahaan jirey taariku-salaad kaddibna Alle ayaa igu galladaystay hanuun waxaan noqday mid ku dadaala gudashada salaadaha, su'aashayduna waxay tahay; Waajib miyay igu tahay in aan qalleeyo salaadihii aan ka tegey sannadihii la soo dhaafay?

Jawaab: Haddii uu qofku ka tago salaadda muddo dhan sannado, kaddibna toobad keeno salaadahana ilaaliyo kuna dadaalo gudashadooda, kuma waajibayso inuu soo qalleeyo salaadihii uu horay uga tagey.

Haddii shardi laga dhigi lahaa inay soo qalleeyaan salaadihii hore arintaasi dad badan ayay toobadda ka hor istaagi lahayd waxaase qofka la farayaa inuu salaadaha ilaaliyo mustaqbalka, isla markaana badiyo sunnooyinka, samafalidda iyo khayrka, Allena uu ka cabsado.

- **Sujuudda Qiraa'ada xaalad kasta way ku bannaan tahay.**

Su'aasha 8aad: Xaqiiqo miyaa inuusan gaalku qof muslim ah ilayn karin? Markii aan akhriyo aayad sujuudi ku jirto ma waxaan sujuudayaa anigoo sidayda ah oo madaxa iyo jirku ii asturnayn?

Jawaab: Arintaasi xaqiiq ma ahan oo gaalku dadka kale ayuu la mid yahay, ishuna waa xaq.

Xaalad kasta oo aad ku sugan tahay sujuudaas waad sujuudi kartaa xataa haddii madaxu kuu bannaan yahay, sida raajixa ahna sujuudaasi salaadda la xukun ma ahan.

- **Waswaaska iyo shakiga**

Su'aasha 9aad: In badan ayaan ku shakiyaa tirada ragcadaha aan tukaday Qur'aanka kor baan u akhriyaa si aan u xusuusto waxaan akhrinayo sidaasoo ay tahay shakigu igama tago, markii aan salaadda dhameeyo waxaan is oranayaa waxaad ka tagtay ragcad ama sujuud ama ataxiyaad, waxaan ku dadaalaa in aanan salaadda dhexdeeda ku shakiyin, waxna kama faa'iido, waxaan idinka rajaynayaa in aad ii bayaanisaan sida aan yeelayo, tan kale haddii xaaladdu sida aan sheegay tahay

igu waajib miyaa in aan salaaddaas ku celiyo? Mase jirtaa duco aan ku ducaysto markaan salaadda bilaabayo oo shakiga iga saarta?

Jawaab: Waxaa waajib ah in aad waswaaska la dagaashid oo aad ka digtoonaatid isla markaasna badisid cawdu billaysiga Allena wuxuu yiri:

(Waxaad dhahdaa (Nabiyow) waxaan ka magangalay Eebbaha dadka barbaariya. Ee dadka xukuma. Ee ah Ilaaha dadka. Sharka midka wax waswaasiya ee isqarinta badan (ayaan kaa magangalay). Ee waswaasiya laabta (Qalbiga) dadka. (Kuwaas wax waswaasiya) oo ah Jinni iyo Insiba).

Wuxuu kale oo Alle yiri:

(Hadduu ku waswaasiyo shaydaan xaggiisa waswaasiye ka magangal Allaah isagaa wax maqla waxna oge).

Marka aad weysaysato ama salaadda tukato haddii aad shakidid markaas shakigu wax ka soo qaad ma leh waxaadna u qaadanaysaa in weysadu ama salaadda saxan tahay, haddiise adigoo salaadda ku jira aad shakidid in aad saddex rakcadood tukatay iyo in aad afar tukatay, waxaad ka soo qaadaysaa in aad saddex tukatay, salaaddana waad dhammaystiraysaa, kaddibna labo sujuudood ayaad sujuudaysaa inta aadan salaamo naqsan, sababtoo ah Nabigu wuxuu amray in uu sidaas oo kale sameeyo qofkii arrintaas oo kale ay ku dhacdo, Alaahna waxaan weydiisanaynaa inuu naga badbaadiyo shayaadiinta.

- **Gambaleelka guriga ayaa la yeeriyey anigoo salaad ku jira.**

Su'aasha 10aad: Haddii anigoo salaad ku jira gambaleelka albaabka la yeeriyo gurigana qof kale joogin maxaa ila gudboon in aan sameeyo?

Jawaab: Haddii salaaddu sunne tahay arintu waa waasic waana ka bixi kartaa salaadda sida adiga oo garanaya dadka albaabka garaacaya oo kale. Haddiise ay salaaddu waajib tahay ma bannaana in lagu degdego, haddii aysan jirin arrin muhim ah oo laga cabsanayo inay ku dhaafto, haddii ay suurta gal tahayna waxaa qofka albaabka garaacaya lagu baraarujin karaa subxaanalaysi gaar ahaan ragga, haweenkuna sacabbada ay isla dhacaan, si qofka albaabka garaacaya u ogaado in qofka guriga ku jiraa salaad ku mashquulsan yahay intaas baana ku filan, sidii uu rasuulku yiri:

Haddiise qofka albaabka garaacaya aanu maqlayn baraarujintaas waxna uusan ka faa'iidayn dhib ma lahan in salaadda sunnada ah looga baxo arrintaas darteed, salaadda waajibka ahna haddii laga cabsanayo in qofka albaabka garaacaya arrin culus hayso (haddii albaabku u dhow yahay dhanka qibladana jiro wax yar ayaad horay u baxaysaa albaabka furaysaa sidii Nabigu yeelay mar ay Caa'isha Allaah haka raali noqdee albaabka soo garaacday isagoo salaad ku jira), dhib ma lahan in laga baxo salaadda oo laga furo albaabka kaddibna salaaddii la soo bilaabo.

- **Dhib kuma sugna in Salaatu Laylka Qur'aanka kitaabka laga akhriyo**

Su'aasha 11aad: Qur'aanka in yar ayaan ka xafidsanahay waxaan jeclahay in aan salaatulaylka Qur'aanka ku khatimo, ma ii bannaan tahay in aan kitaabka ka akhriyo Qur'aanka markaan tukanayo?

Jawaab: Dhib kuma sugna arrintaas Bukhaarina wuxuu kitaabkiisa saxiixa ah tacliiq ahaan ugu wariyey in Caa'isha Allaah ha ka raali noqdee mawlaheedii ay xoraysay oo la oran jirey Dakwaan uu

Ramadaanta tujin jirey isagoo Qur'aanka ka akhrinaya musxafka, sidaas ayayna qabaan ahlu cilmiga badankoodu dadka diidaya ma haystaan xujo fiican oo la cuskan karo, sababtoo ah dadku Qur'aanka ma wada xafidsana aad baana loogu baahan yahay in Qur'aanka kitaabka laga akhriyo haddii salaad la tukanayo iyo haddii kaleba, gaar ahaan salaatulaylka iyo taraawiixda iyo tahajudka Ramadaanta dadka aan Qur'aanka xafidsanayn.

- **Inta ugu yar iyo inta ugu badan ee tasbiixda la akhriyo rukuucda iyo sujuudda**

Su'aasha 12aad: Maxay tahay tirada ugu yar iyo tan ugu badan ee la akhriyo tasbiixda rukuucda iyo sujuudda?

Jawaab: Rukuucda waxaa la akhriyaa [سبحان رب العظيم وبحمده] sujuuddana [سبحان رب الأعلى وبحمده] waxaana ugu yar inta la oranayo middiiba 3 jeer waxaana ugu badan imaamku inuu yiraahdo 10 jeer, laakiin qofku haddii uu hal mar yiraahdo waajibku waa ka dhacayaa, waxaana sunno ah tasbiixda kaddib in Allaah la amaano marka la rukuucsan yahay, sujuudana waxaa la badinayaa ducada.

- **Xukunka Sujuudda Qur'aanka**

Su'aasha 13aad: Miyay igu waaajib tahay in aan sujuudo haddii aan akhriyo aayad ay ku jirto sujuud?

Jawaab: Sujuudda Qur'aanka akhrintiisa ku timaada waa sunno la adkeeyey oo aysan haboonayn in laga tago, haddii qofku soo maro aayad sujuudi ku jiro waa inuu ku sujuudo, haddii uu Qur'aanka kitaab ka akhrinayo ama uu kor ka akhrinayo ama uu salaad iyo qayrkeed ku akhrinayo kuligood waa isku mid, waajibse ma ahan haddii uu ka tagana kuma dambaabayo, waayo waxaa ka sugnaatay amiirkii mu'miniinta Cumar bin Khadaab inuu akhriyey Aayad sujuudi ku jirta suuradda Al-Naxal isagoo khudbad jimce akhrinaya oo uu inta soo degtay sujuuday, jimcadii xigtayna uu akhriyey isla aayaddii isagoon ku sujuudin, kaddibna uu yiri: Alle naguma waajibin sujuudda (Macnaha sujuudda Qur'aan akhriska ku timaada) in aan annagu doonno mooyaane, wuxuuna hadalkaas ka yiri saxaabadii Nabiga hortooda waxaana dhacay in Zeyd bin Thaabit uu Nabiga ku dul akhriyey suuradda Al-Najmi mana ku sujuudin, hadday waajib tahayna wuxuu fari laha inuu ku sujuudo, sidaas darteed sujuuddaasi waa sunno la adkeeyey oo aysan haboonayn in laga tago, xataa haddii ay tahay waqtiyada la diiday salaadda, sida salaadda subax iyo tan casar gadaashooda, sababtoo ah sujuuddani sabab ayay ku timid, waxaa taas iyana la mid ah salaadaha sababta leh oo dhan waana la tukanayaa xataa waqtiyada salaadda la diiday, waxaana salaadahaas ka mid ah; taxiyatul masjidka iyo sujuudda ku timaadda Qur'aan akhrinta iwm.

- **Salaadda oo hurdo awgeed looga dib dhaco**

Su'aasha 14aad: Anigu waxaan ahay gabar in badan ayayna salaadda maqrib hurdo awgeed iiga tagtaa, waxaan qalleeyaa subixii ama waqti dambe, haddaba arrintaas xukunkeedu sidee noqonayaa?

Jawaab: Arrintaas xukunkeedu waa in aysan qofna u bannaanayn inuu salaadda fududaysto ilaa waqtigeedu ka baxayo, haddii uu qofku hurdo, qof kale ayuu kala dardaarmi karaa inuu toosiyo si uu u tukado waana lama huraan arrintaasi, suurta galna ma ahan in salaadda maqribka ama cishaha la tukan ilaa subaxa laga gaarayo balse waxaa waajib ah in aad salaadda waqtigeeda ku tukatid, gabadhaasna waxaa laga doonayaa inay ehelkeda ku booriso inay toosiyaan.

Haddii ay dhacdo arrin kadiso ah ama arrin aan caadi ahayn oo hur badani hayso salaaddii maqribna ay tukatay ayna ka cabsato haddii seexato iyadoo aan cishaha tukan inay hurdo ka qaalib noqoto oo ay subax ka hor soo toosi weydo, xaaladdaas oo kale dhib ma lahan inay cishaha iyo maqribka wada tukato si aysan salaadda cishuhu u dhaafin waqtigeeda, arrintaasna ma dhacdo in xaalad aan caadi ahayn jirto mooyaane, si iyadoo soo jeedda habayno, ama ay xanuunsan tahay iwm.

- **Xanuunka foosha iyo salaadda**

Su'aasha 15aad: Ma ii bannaan tahay in aan tukado anigoo dareemaya fool (xanuun dhalmada)?

Jawaab: Haweentu way tukanaysaa markii ay daahir ka tahay dhiigga caadada iyo kan dhalmada, haddiise dhiig ka yimaado maalin iyo wax la mid intaysan dhalin ka hor dhiiggaasi wuxuu la xiriiraa kii dhalmada kumana tukanayso.

Haddii aysan dhiig isku arag way tukanaysaa xataaa iyadoo xanuun dhalmadu hayo, sida uu qofka xanuunsanba u tukado isagoo xanuun dareemaya, salaadduna kama dhacayso inta uu qofka caqligiisu taam yahay.

- **Goynta salaadda**

Su'aasha 16aad: Haddii aan is hilmaamo oo ku tukado maro nijaaso ah kaddibna aan xusuusto anigoo salaadda ku dhex jira, miyay ii bannaan tahay inaan salaadda gooyo, oo marada iska beddelo? Maxayse yihiin xaaladaha salaadda la goyn karo?

Jawaab: Ruuxii tukada isagoo og inay maradiisu nijaaso leedahay salaadiisu way burtay, haddiise uu tukado isagoo najaaso leh aanse isku ogayn salaaddiisu way ansaxaysaa, mana soo celinayo, haddiise uu ogaado isagoo salaadda ku dhex jira nijaasaduna ay tahay mid uu si dhakhso leh isaga suulin karo wuu iska suulinayaa nijaasada, salaaddiisana wuu dhammaystiranayaa,

Waxaana dhacday in Jibriil u yimid Nabiga oo salaad ku jira una sheegay in kabihiisu najaaso leeyihiin, Nabiguna uu kabihii iska bixiyey, salaaddiina aysan ka burin (oo dhammaystiray), waxaana taas la mid ah haddii aad najaaso ku aragtid cimaamadda iwm oo dharka la iska tuuri karo ah, haddiise uu u baahdo inuu iska siibo khamiiska ama surweelka oo iyagu hawl u baahan waqtina qaadanaya, salaaddu way kala go'aysaa (waana inuu soo bilaabo mar kale), sidoo kale salaaddu way buraysaa hadduu ogaado isagoo tukanaya in aanu weeso qabin ama weysadu ka burto ama uu la yimaado qosol iwm.

- **Sahwiga salaadda**

Su'aasha 17aad: Waxaan tukaday salaad Duhur, markaan salaaddii ka baxay ayaan ogaaday in aan saddex rakacadood tukaday, haddaba ragcadda dhimman miyaan tukanayaa oo sujuuddii sahwiga la imaanayaa mise salaadda oo dhan baan ku celinayaa?

Jawaab: Haddii qofka tukanayaa ka tago ragcad ama wax ka badan oo salaaddiisa ka mid ah waqti yar kaddibna uu xusuusto sida shan daqiiqo oo kale isagoo jooga halkii uu ku tukaday wuxuu dhammaystirayaa salaaddiisa intii u dhimanayd kaddibna wuu salaama naqsanayaa, markuu salaamo

naqsado kaddib ayuu haddana laba jeer sujuudayaa (sujuuddii sahwiga) kaddibna wuu salaama naqsanayaa.

Haddii uu xusuusto rakcadda uu ka tagey nus-saac iyo wax la mid ah kaddib ama uu xusuusto isagoo ka tagey meeshuu ku tukaday, salaadda wuu ku celinayaa dhammaanteed intii horena waxba laga soo qaadi mayo maadaama rakcadihii salaaddu aysan xiriir ahayn.

- **Salaad la tukaday xijaab la'aan**

Su'aasha 18aad: Waxaa dhacda marmarka qaarkood inay duruufi igu khasabto in aan tukado anigoon xijaabnayn ama aan si sharciga waafaqsan u xijaabnayn, oo timahayga qaar ka muuqdo ama ay dhudhumadu i muuqdaan, haddaba sidee arrintaas xukunkeedu noqonayaa?

Jawaab: Marka ugu horraysa waxaa haboon in la ogaado inuu xijaabku haweenka waajib ku yahay oo aysan haboonayn inay ka tagaan ama ay fudadaystaan, haddiise salaad waqtigeed soo galo iyadoon xijaabnayn ama aan si fiican u asturnayn markaas arrinteeda waa la kala qaadayaa.

1. Haddii ay weydo waxay ku xijaabato ama duruuftu u saamixi weydo inay si fiican isu asturto sideeda ayay ku tukanaysaa salaaddeeduna waa ansaxaysaa kumana danbaabayso Allaaha wuxu yiri: (Allaah ruuxna kuma kalifo waxaanu awoodin). Aayad kalena wuxuu ku yiri: (Alle ka cabsada intaad kartaan)

2. Haddii ay la xijaaban wayday oo ay isla asturi weydey hawo raacid iyo ku dayasho caadooyin kale iwm, oo jirkeeda aan xijaabneyn ku eg yahay wajiga iyo calaacalaha meeshana ay joogaan rag ajnabi ka ah way dambaabaysaa salaadeeduse way ansaxaysaa. Haddii jirka aan asturneyn uu yahay gacmaha iyo kubabka ama dhudhumada lugaha iyo timaha iwm salad inay tukato uma bannaana, haddii ay sidaas ku tukatana salaaddeedu waa baadil, waxayna dambaabeysaa labo jeer oo kala ah: astur la'aanta jirkeeda iyo salaadda ay gashay iyadoo xaaladdaas ku sugan.

- **Salaadda masjidka**

Su'aasha 19aad Haddii ay gabadha muslimadda ah u xijaabato si sharciga waafaqsan, ayna jirkeeda oo dhan asturto waxaan ka ahayn wajiga iyo calaacalaha, ayna doonayso in ay salaadaha oo idil masjidka ku tukato ma u bannaan tahay arintaasi, mise waa inay ninkeeda markasta masjidka u raacdo?

Jawaab: Dhib kuma sugna in ay haweentu masaajidka ku tukato haddii ay si sharciga waafaqsan u xijaaban tahay oo ay wajigeeda iyo gacmaheedaba qariso isla markaana aysan is carfin marka ay baxayso rasuulkuna wuxuu yiri:

(Haweenku ha u diidina masaajidda Ilaahay) isla xaddiiskaas dhaammaadkiisa rasuulku wuxuu yiri: (Guryahoodaana u khayr badan).

- **Qur'aanka salaadda lagu tukado kor ma u qaadayaan haweenku?**

Su'aasha 20aad: Waa maxay xukunka inay haweenku salaadda u aqimaan, iyo inay Qur'aanka kor u akhriyaan markay salaadda tukanayaan iyo inay gacmaha kor u qaadaan markay takbiirsanayaan?

Jawaab: Asal ahaan wixii u sugnaaday ragga oo axkaam ah haweenkana waa u sugnaaday wixii loo helo daliil qaacidadaas khilaafsan mooyaane, wax kasta oo salaadda ku saabsan oo ragga u sugnaaday haweenkana waa u sugan yihiin, wixii daliil kala saaraya loo helo mooyaane, waxaana ka mid ah waxay ku kala duwan yihiin akhriska salaadda oo haweenku kor ugu dhawaaaqi mayaan salaadaha jahriga ah ee akhriskooda kor loo qaado, haddiise ay gurigeeda ku tukanayso rag maqlayaana jirin markaas dhib kuma sugna inay kor u qaaddo Qur'aanka ay salaadda ku tukanayso, gacmo kor u qaaditaanka dumarku ragga ayay kala mid yihiin.

- **Nin aan tukan sidee loola joogayaa**

Su'aasha 21aad: Haddii haweentu tukato ninkeeduna aanu tukan miyay sidaas kula joogaysaa?

Jawaab: Haddii haweenta la qabo ninkeedu aanu tukan, oo la xaqiijiyo in uusan ku tukan masaajidka iyo guriga midna, way ka fasakhmaysaa xaasna uma noqon karto umana bannaana inuu naagaysto, sababtoo ah ajnabi ayay ka noqotay waxaana waajib ah inay reerkoodii aaddo oo ay falankeeda gasho sidii ay uga madax bannaanaan lahayd ninkaas isaga ah ee gaaloobay islaamnimadiisi kaddib, waxaan ka rajaynayaa haweenka inay hadalkaygan qaataan, waxaan oranayaa: Haweeney kasta oo ninkeedu aanu tukan uma bannaana inay la joogto qaddar yar oo il biriqsi dhan, haddii ay caruur u haysana caruurtu iyaday raacaysaa oo isagu xaq kuma laha tarbiyadooda, waayo gaal xanaanayn kuma lahan muslim, haddiise Allaah soo hanuuniyo oo uu tukado markaas way u noqonaysaa haddii aysan ciddadii dhammaan, haddiise ciddadu dhammaato intuusan salaaddii ku soo noqon go'aan ayay ka gaari kartaa, culimada badankeedu waxay qabaan ninka murtadka ah ee diinta ka baxay xaaskiisu haddii ay ciddadu u dhammaato isagoo aan wali diinta u soo laaban inaysan ku noqonayn nikaax cusub inay sameeyaan ma'ahee.

- **Asturidda cagaha iyo cumaacumaha marka salaadda la tukanayo.**

Su'aasha 22aad: Muxuu yahay xukunka asturidda cumaacumaha gacanta iyo cagaha, marka salaadda lagu jiro? Waajib miyay ku tahay inay haweentu qariso, mase bannayn kartaa gaar ahaan haddii aysan dad ajaanib ahi la joogin ama ay haween la tukanayso?

Jawaab: Waxaa sunno ah in wajiga la baneeyo marka salaad la tukanayo haddii aysan arkayn dad ajaanib ka ah, laakiin cagaha in la qariyo ayaa waajib ah, sida ay qabaan jamhuurka culimadu, waxaa jirta in culimada qaarkood ay baneeyaan in aan la qarin cagaha, waxaase waajib ah in la asturo sida ay qabaan jamhuurka ahlu cilmigu.

Abu Daawuud wuxuu Umu-Salama Alle ha ka raalli noqdee ka wariyey in la weydiiyey haweeney ku tukanaysa cambuur ayna ku tiri:

(Dhib ma lahan haddii cagaheeda hoose uu qarinayo) waxaana dhowrsanaantu ku jirtaa in la qariyo sidaas ayaana wanaagsan dhan kastaba, ahlu cilmiga qaarkood waxay qabaan in la asturo inay mudnaanta leedahay.

- **Kee dambi badan taariku salaadka iyo saaniga**

Su'aasha 23aad: Ilaahay wuxuu naga xaaraan-tinimeeyey in aan salaadda ka tagno iyo in aan sinaysano, haddaba kee ayaa labadooda dambi badan?

Jawaab: Salaadda ka tagiddeeda ayaa ka dambi badan sinada, waayo qofka salaada ka taga gaalnimo cad ayuu la yimid oo diinta wuu ka baxay, laakiin sinadu waxay ka mid tahay dambiyada waaweyn qofkuna kuma gaaloobayo haddii uusan xalaalaysan, waxaana waajib ah in lagu qaado xugunkii sharciga ahaa ee qofka sinaysta ciqaabtiisa ahayd haddii arintiisa la soo gaarsiiyo maamulka ka jira halka uu jooga.

- **Nin xaaskiisa salaadda kala quustay.**

Su'aasha 24aad: Maxaa la gudboon ninku haddii uu xaaskiisa ku baraarujiyo inay tukato salaadda oo ay tukan weydo?

Jawaab: Xaaskiisu haddii aysan tukanayn diinta way ka baxday wayna gaaloowday mana bannaana inay sidaas kula joogto waxaana ku waajiba inuu waaniyo oo ku boorriyo inay Allaah ka cabsato, waayo ruuxa aan tukan waa gaaloobay diinna malahan waxaana u daliila kitaabka Allaah iyo sunnada Nabiga iyo qowlka saxaabada iyo caqliga wanaagsan, Qur'aanka waxaan daliil u soo qaadan karnaa Allaah markii uu mushrikiinta ka hadlayey oo uu yiri:

(Haddii ay toobad keenaan oo Salaadda oogaan Sakadana bixiyaan waa walaalihiinna diinta).

Aayadda waxaan ka fahmaynaa sida la faray haddii aysan yeelin inaysan walaalnimo naga dhexayn, Nabiguna wuxuu yiri:

(Qofka iyo gaalnimada iyo shirkiga waxaa u dhexeeya salaadda ka tegiddeeda).

Xaddiiskii Burayda ayaa isna sidoo kale xusay wuxuuna ahaa:

(Annaga iyo gaalada waxaa noo dhexeeya salaadda, ruuxii ka tagaana waa gaaloobay).

Cumar bin Khaddaab waxaa laga wariyey inuu yiri: (Ruuxa aan tukani Islaamka waxba kuma lahan).

Cabdulaahi bin Shaqiiq wuxuu yiri: Asxaabtii Nabigu uma aanay arkayn camal ka tegiddiisu gaalnimo tahay salaadda ma ahee.

Haddii aan maskax caafimaad qabta wax ku eegno waxaa arrin la is weydiiyo ah ruux ay qalbigiisa ku jirto in yar oo iimaan ah oo garanaya salaadda weynaanteeda iyo sida uu Allaah u qaddariyo inuu ku dhiirado ka tegiddeeda? Waa arrin aan suurta gal ahayn.

Haddaba markii ay inoo caddaatay ruuxa salaadda ka tagey gaalnimadiisa waxaa ka ratibmaysa axkaam, waana sidan:

1. Ma bannaana in loo guuriyo isagoo aan tukan, haddii loo guuriyana ma ansaxayo nikaaxaasu xalaalna uma ahan Alaahna wuxuu yiri: (Haddii aad ogaataan inay xaqa dhabnimo u rumeeyeen ha u celinina gaalada, maxaa yeelay xalaal isuma ahan).

2. Ruuxa aan tukan wuxuu gawraco lama cunayo, waana xaaraan, waxaana ka wanaagsan wixii ay gawracaan Yahuudda iyo Kiristaanku.

3. Uma bannaana inuu Makka iyo xudduudeeda galo, Allaahna wuxuu yiri: (Kuwa xaqa rumeeyoow mushrikiintu (gaalada) waa nijaaso ee yaanay u soo dhawaan masjidka xurmaysan sannadkaan kaddib).

4. Haddii uu dhinto qof ay is xigaan dhalasho ahaan ma dhaxlayo ruux aan tukan, matalan wiil iyo aabihiis haddii aanu wiilku tukan ma dhaxlayo aabihiis rasuulkuna wuxuu yiri: (Muslim iyo gaal midkoodna kan kale ma dhaxlo).
5. Haddii uu dhinto la mayri mayo lamana kafnayo lagumana tukanayo, qubuuraha muslimiintana lagu aasi mayo, haddaba sidee loo galayaa? Waxaa la geynayaa bannaanka oo inta god loo qodo lagu duugayaa, waayo xurmayn malahan, sidaas darteed ma bannaana qof aan tukan haddii uu geeriyoodo in muslimiinta loo keeno si ay ugu tukadaan jinaaso.

6. Maalinta qiyaamaha waxaa lala soo faylinayaa madaxdii gaalada Fircoon, Haamaan, Qaaruun iyo Ubaya bin Khalaf, jannadana geli mayo mana u bannaana in loo duceeyo oo Allaah dambi dhaaf loo weydiiyo sababtoo ah ma uu mutaysan waana arrin aad halis u ah, maantana waxaad arkaysaa qaar dadka ka mid ah oo ay guriga kula nool yihiin dad aan tukan arrintaasina ma bannaana Allaahna waxaan weydiisanaynaa badbaado.

- **Kee la hor marinayaa lawyaha iyo calaacalaha marka la sujuudayo**

Su'aasha 25aad: Marka la sujuudayo keebaa sax ah in la hor mariyo gacmaha ama jilbaha?

Jawaab: Sida saxiixa ah waxaa la hor dhigayaa jilbaha kaddibna gacmaha kaddibna wajiga sida uu xusay xaddiiskii uu Nabiga ka wariyey Waa'il iyo axaaddiista kale oo la macnaha ah.

- **Salaadda la tukado witriga gadaashiis**

Su'aasha 26aad: Haddii aan witriga tukado habeenka qaybtiisa hore kaddibna aan soo tooso habaynka qaybtiisa dambe, sidee u tukanayaa?

Jawaab: Haddii aad witriga tukatid habeenka qaybtiisa hore kaddibna Allaah kuu fududeeyo in aad salaatu layl u soo kacdid habeenka aakhirkiisa, waxaad tukanaysaa wixii Allaah kuu fududeeyo oo salaad ah adigoo u tukanaysid labo labo ragco oo aan witri lahayn (waayo witrigii horay ayaad u soo tukatay). [Waxaa sidaas qaba Xambaliyada laakiin Imaamu Shaafici wuxuu qabaa haddii aad soo toostid gelinka dambe adigoo horay witrigii u tukaday waxaad tukanaysaa hal ragco oo aad shafci uga dhigaysid witrigii hore kaddibna wixii kuu fududaada ayaad tukanaysaa.] Nabigu wuxuu yiri: (Hal habeen labo witri ma leh).

Caa'ishana Allaah ha ka raalli noqdee waxaa laga wariyey inay tiri: Xigmadda arrintaas ku jirta Allaah ayaa og waxaase laga yaabaa in ummadda la tusayey in salaad la tukan karo witriga gadaashiis.

JINAASADA

- **Salaadda jinaasada iyo haweenka**

Su'aasha 1aad: Waxaa dhacay in masjidka xaramka iyadoo la joogo lagu dhawaaqo salaad jinaaso ah haddaba ma u bannaan tahay habluhu inay salaaddaas wax ka tukadaan?

Jawaab: Haweenku ragga ayay kala mid yihiin tukashada jinaasada, wax daliil ah oo haweenka u diidayana lama hayo waxayna ka helaysaa ajarka ninku ka helayo oo kale. Ragga taariikhda islaamka wax ka qoraa waxay sheegeen waagii Nabiga inay haweenku salaaddaas tukan jireen oo ay ragga gadaashiisa safan jireen, sidaas darteed dhib kuma sugna, waana arrin loo baahan yahay haddii jinaaso la keeno qofkii dumar ah ee markaas joogta inay wax ka tukato salaaddaas.

- **Dhib ma leh ninku inuu xaaskiisa mayro**

Su'aasha 2aad: Waxaan dadka caamada ah ka maqalnaa in badan ninka inay ka xaaraan tahay inuu eego xaaskiisa marka ay geeriyooto, marka iilka la dhigayana aanu soo geli karin qabriga gudihiisa si uu u bud dhigo, haddaba arintaasi sax miyaa? Nooga jawaaba Allaah ha idin barakeeyee?

Jawaab: Daliilka sharciga ah wuxuu tusinayaa in aan dhib ku sugnayn inay haweentu ninkeeda mayrto oo ay jirkiisa eegto, ninkuna sidoo kale wuu mayri karaa xaaskiisa wuuna eegi karaa, Asmaa binti Cumays Allaah ha ka raalli noqdee waxay mayrtay ninkeedii Abubakar As-Siddiiq Allaah ha ka raalli noqdee, sidoo kale Faadumo Allaah ha ka raalli noqdee waxay ka dardaarantay in uu mayro Cali oo ninkeedii ahaa Allaah dhammaantood ha ka raalli noqdo.

- **Haweenka wuu bud dhigi karaa nimaan maxram u ahayn**

Su'aasha 3aad: Waxaan ahay nin lug go'an xaaskaygii ayaa muddo xanuunsanayd kaddibna isbitaal ayay ku dhimatay, markii la aasayey waxaa bud dhigay rag ajaanib ka ah, aniguna waan la joogey oo ma aanan awoodin in aan bud dhigo lugta i go'an awgeed, arintaasna waan ka wal walsanahay, sidee ayuu arrintaas xukunkeedu noqonayaa?

Jawaab: Dhib malahan haweenka inuu bud dhigo nin aan maxram u ahayn, maxramkuna wuxuu khuseeyaa haweenku markay safar gelayaan iwm.

- **Waxa anfacaya maydka marka uu dhinto kaddib**

Su'aasha 4aad: Nin ayaa markuu dhintay xaaskiisa u dardaarmay inaysan waxba u sadaqayn, Qur'aanna loo akhrin, wuxuuna sheegtay Qur'aan in ku filan inay laabtiisa ku jirto, haweentiisuna kuma aanay ogayn inuu Qur'aanka xifdiyo, haddaba maku saxan yahay dardaarankaas? Waxay haweentiisu doonaysaa inay wax u hadiyayso ee ma u bannaan tahay?

Jawaab: Dardaarankaas waa la oofinayaa waayo waxaa bidco ah in la kiraysto dad maydka Qur'aan u akhriya oo u hibeeya, ummaddaan horraankeedii qof ka mid ahna lama warin in uu sidaas yeelay ama fasaxay, qofka Qur'aanka dadka bara oo lacag ku qaata culimadu way isku khilaafsan yihiin, (wayna ka duwan tahay arintaani), waxay culimadu isla soo qaadeen oo ka wada hadleen qofka Qur'aanka Allaah dartiis u akhrinaya kaddibna qof dhintay u hadiyaynaya (ee islamaba soo qaadin kan ujrada ku qaadanaya oo qof dhintay u hibaynaya).

Sababtoo ah Qur'aan akhriska haddii ujro lagu qaato waxay arintu noqonaysaa wax kala bedelasho ajarna lagama helayo, qofkii dhintayna waxba ka gaari mayaan maydkana waxaa gaari kara wixii camal suuban ah.

Haweentu haddii ay doonayso inay ninkeeda wax u tarto ha u sadaqayso maalkii ay siin lahayd dadka Qur'aanka u akhrinaya, sababtoo ah sadaqadu waa gaaraysaa qofka dhintay sida ay culimadu isku raacsan yihiin, wayna haboon tahay haddii ay ku sadaqaysato dad masaakiin ah oo ahlu Qur'aan ah, si ay Qur'aan akhrintooda ugu kaalmaystaan, maydkana Allaah wuu ku anfacayaa.

- **Xukunka baroordiiqda**

Su'aasha 5aad: Marka maydka la aaso muxuu yahay xukunka in saddex maalmood baroordiiq la isugu yimaado oo Qur'aan la akhriyo?

Jawaab: Guriga laga dhintay in la isugu yimaado iyadoo cunto iyo cabitaan ama Qur'aan akhris loo imaanayo waa arrin bidco ah, sidoo kale haddii guriga la isugu soo ururo in loo duceeyo maydka waa arrin bidco ah, dadka laga dhintay waxaa loogu yimaadaa in loo tacsiyeeyo oo la sabirsiiyo loona duceeyo oo maydkooda dhintay Allaah naxariis loo weydiiyo, laakiin in la isugu yimaado guriga laga dhintay oo ducooyin gaar ah la akhriyo ama Qur'aan la akhriyo oo lagu negaado halkaas waa arrin aan diinta asal ku lahayn, haddii ay arintaasi khayr tahayna waxaa nooga hor mari lahaa muslimiintii ceelalyada inoo ahayd ee naga horraysey oo noolayd qarniyadii fadliga badnaa (Salafu Saalix), Nabiguna ma yeelin sidaas markii la dilay Jacfar bin Abi Daalib iyo Cabdullaahi bin Rawaaxa iyo Zayd bin Xaaritha oo dhammaantood lagu dilay dagaalkii Mu'tah Nabigu markii waxyigu u yimid oo loo sheegay dhimashadooda ayuu saxaabada ogaysiiyey geeridooda, wuuna u duceeyey wuuna ka raalli noqday, dadkana ma uu kulmin mana uu dhigin tacsi, arrimahaas oo dhan ma uu samayn, iyadoo raggaas geeriyooday ay ka mid ahaayeen kuwa saxaabada ugu khayr badan uguna fadli badan, markii uu geeriyooday Abubakar As-Sidiiq looma dhigin tacsi wuxuuna ugu fadli badnaa saxaabada Nabiga, waxaa la dilay Cumar wax tacsi ah looma dhigin dhimashadiisii Qur'aanna looma akhrin, waxaa la dilay Cismaan iyo Cali, loomana dhigin tacsi, dadkuna markaas kaddib ma ay samaysan maalin go'an oo loo duceeyo oo Allaah naxariis loo weydiiyo ama cunto loo sameeyo.

Waxaa sunno ah dadka laga dhintay in cunto loo soo sameeyo oo cuntada ay u sameeyaan qaraabadoodu ama dariskoodu (halkii iyaga cunto loo soo doonan lahaa), sidii uu Nabigu sameeyey markii geerida Jacfar loo soo sheegay, wuxuuna ku yiri ehelkiisii:

(Reer Jacfar arrin mashquulisa ayaa ku timide cunto u sameeya). Dadka laga dhintay masiibada ku dhacday ayay mashquul ku yihiin, waxaa sunno ah in cunto la sameeyo oo loo geeyo, laakiin in

balaayadii ku dhacday balaayo kale loogu sii daro oo lagu kallifo inay dadka cunto u sameeyaan waa arrin bidco ah oo sunnada khilaafsan.

Waxaa la wariyey Jariir bin Cabdullaahi Al-Bajali inuu yiri:

(Maydka marka la aaso kaddib in la isu yimaado oo cunto la sameeyo waxaan ku tirin jirney inay tahay baroordiiq), waana la xaaraantinimeeyey in maydka loo ooyo iyadoo codka kor loo qaadayo, maydkana qabriga ayaa lagu cadaabaa haddii loo ooyo, marka sidaas awgeed waa in laga digtoonaado arrintaas, waxaase jirta haddii qofku ilmeeyo isagoon codkii oohintu ka soo baxayn inaysan dhib lahayn.

- **Oohinta loo ooyo qofka dhintay**

Su'aasha 6aad: Ma bannaan tahay in maydka loo ooyo, iyadoo oohintaasi tahay mid hinraag iyo cod ka soo baxayo, oo waliba qofkaasi dhabannada iska dharbaaxayo dharkana iska jeex jeexayo, haddaba oohinta caynkaas ah maydka ma saamaynaysaa?

Jawaab: Ma bannaana oohinta iyo baroordiiqdu, sidoo kale ma bannaana in dhabannada la iska tumo oo dharka la iska jeex jeexo iwm, Bukhaari iyo Muslim waxay qoreen xaddiis uu warinayo Ibnu Mascuud oo Nabigu yiri:

(Naga mid ma ahan qofkii (markii musiibo ku dhacdo) dhabannada iska tuma oo dharka iska jeex jeexa, oo sidii gaaladii jaahilka ahayd u dhawaaqa), waxaa kaloo Nabigu laga wariyey inuu lacnaday tan u ooyda maydka iyo tan dhegeysataba.

Waxaa saxiix ah oo Nabiga laga wariyey inuu yiri:

(Maydka waxaa lagu cadaabaa qabriga oohinta loo ooyey sababteeda). Waxaa kaloo laga wariyey Nabigu inuu yiri:

(Maydka waxaa loogu cadaabaa qabrigiisa oohinta ehelkiisu u ooyeen darteed).

- **Dhabannada oo la iska tumo iyo dharka oo la iska jeexjeexo marka musiibo timaado**

Su'aasha 7aad: Muxuu yahay xukunka sharciga ah ee haweenka marka laga dhinto dhabannada iska dharbaaxa oo dharka iska jeexjeexa?

Jawaab: Ma bannaana marka musiibo dhacdo in dhabannada la iska tumo oo dharka la iska jeexjeexo oo la ooyo, dhammaan arimahaas oo dhan waa xaaraan waxaana u daliil ah qawlka Nabiga ee ah:

(Naga mid ma ahan qofkii (markii musiibo ku dhacdo) dhabannada iska tuma oo dharka iska jeex jeexa, oo sidii gaaladii jaahilka ahayd u dhawaaqa), xaddiiskan waa la isu waafaqay saxiixnimadiisa (Bukhaari iyo Muslim). Waxaa kaloo Nabigu yiri:

(Anigu bari ayaan ka ahay tan qaylisa iyo tan xiirata iyo tan dharka iska jeex jeexda (marka musiibo ku dhacdo)).

Wuxuu kaloo Nabigu yiri:

(Afar arimihii jaahiliga ah umadayda ayaa ku sugan kamana tagayaan, qabiilka oo lagu faano iyo nasabka oo la duro iyo xiddigaha oo lagu roob doono iyo maydka oo loo ooyo).

Wuxuu kaloo Nabigu yiri:

(Haweenta u ooyda maydka haddii intay nooshahay aysan toobad keenin, waxaa qiyaamaha la soo saarayaa iyadoo xiran qamiis daamur ah iyo mid cadho ah).

Marka musiibo dhacdo waxaa waajiba in la sabro oo ajar la xisaabsado, lagana digtoonaado waxyaalaha aan haboonayn ee munkarka ah Allaahna looga toobad keeno wixii horay u dhacay, Allaah wuxuu Qur'aanka kariimka ah ku yiri:

(U bishaaree kuwa sabra oo markii musiibo ku dhacdo yiraahda Allaah ayaa na leh xaggiisa ayaana u noqonaynaa).

Ilaahay khayr badan ayuu u yaboohay dadka sidaas yeela wuxuuna yiri:

(Kuwaasi waxay helayaan deeq Allaah iyo naxariistiisa, waana kuwa hanuunsan).

- **Haweenku qubuuraha ma booqan karaan.**

Su'aasha 8aad: Muxuu yahay xukunka booqashada qubuuraha ee haweenka?

Jawaab: culumada qaar weybanaynayaan lakin lama ogolo in badan inay ku noqnoqto ayay leeyihiin culumada qaarna uma bannaana ayay dhahaan haweenku siyaartaan qubuuraha , sababtoo ah haweenka sabirkoodu waa yar yahay Allaahna naxariistiisa iyo ixsaankiisa ayuu haweenka uga xaaraantinimeeyey inay qubuuraha booqdaan si aysan ugu fitnoobin waxna u fidnayn.

SOONKA

- **Dib u dhigidda qallaynta soonka.**

Su'aasha 1aad: Muxuu yahay Xukunka dib u dhigidda qallaynta soonka ilaa Ramadaan kale laga gaaro?

Jawaab: Qofkii Ramadaan u afura jirro ama safar iwm awgood waxaa ku waajiba inuu qalleeyo intaan la gaarin Ramadaanta kale labada Ramadaan inta u dhexaysana Allaah wuu noo ballaariyey, qofkii qallayn waaya soonka inta aanu soo galin Ramadaanka kale waxaa ku waajibaya qallayn iyo quudin miskiin maalin kasta oo maalmahaas lagu leeyahay ka mid ah.

Waxaa sidaas laga wariyey koox ka mid ah asxaabtii Nabiga ﷺ, quudintaasna qaddarkeeda waxaa lagu qiyaasay kiilo iyo bar cuntada waddanka laga cuno ah, sida Bariis, Timir iwm, haddiise uu qalleeyo soonka inta aan la gaarin Ramadaanta kale wax quudin miskiin ah kuma waajibin.

- **Haweeney la hadalkeed iyo gacanteeda oo la taabto maalin bil Ramadaan**

Su'aasha 2aad: Waxaa jirta in goobaha ganacsiga badankooda haweenku ay gacanta ku hayaan, haddaba iyadoo arintaasi jirto muxuu yahay xukunka in haween lala hadlo ama gacanteeda la taabto maalin bil Ramadaan?

Jawaab: Haddii ninku haweenta la hadlo isagoo xumaan uga dan lahayn oo aan doonayn inuu hadalkeeda ku raaxaysto, sida haddii uu wax ka gadanayo ama uu wax weydiinayo ama si aan ula kac ahayn gacantiisu u taabato, dhibaato maleh bisha Ramadaan iyo bilaha kaleba, haddiise uu la hadalkeeda uga dan leeyahay inuu ku raaxaysto uma bannaana bisha Ramadaan iyo bilaha kaleba, bisha Ramadaanna way ka sii xag jirtaa.

- **Haweentiisi ayuu u galmooday maalin bil Ramadaan**

Su'aasha 3aad: Muxuu yahay xukunka nin u galmooday xaaskiisa maalin bil Ramadaan?

Jawaab: Ninkii u galmooda xaaskiisa maalin bil Ramadaan isagoo caqligiisu taam yahay qaan gaarna ah, rabbi iyo rasuulkiisii ayuu caasiyey, waxaana ka ratibmaya falkiisaas inuu qalleeeyo maalintaas uu soonkeeda buriyey iyo kafaaro gud ah inuu addoon xoreeyo, haddii uu waayana wuxuu soomayaa laba bilood oo xiriir ah oo aanu maalin ka afurin, haddii uu awoodi waayo wuxuu quudinayaa lixdan

miskiin isagoo siinaya miskiin kasta hal Suus (mud) oo cuntada waddankaas loogu isticmaal badan yahay ah.

- **Xaamiladu haddii ay afurto soonka way qallaynaysaa**

Su'aasha 4aad: Haweeney xaamilo ah ayaa afurtay bil Ramadaan kaddibna way qallaysay maalmihii ay afurtay fidyana way bixisay, haddana mar kale ayay uur yeelatay bil Ramadaan, way afurtay waxayna soontay laba bilood oo isku xigta, oo qallihii bisha Ramadaan ah, haddaba fidyo miyaa laga doonayaa?

Jawaab: Haweenta xaamilada ahi haddii ay nafteeda ama ilmaha u cabsato, way afuraysaa fidyana bixin mayso, waxayse qallaynaysaa maalmihii ay afurtay, waxayna la mid tahay ruuxa jirran oo kale, Allaahna wuxuu yiri:

"Qofkii idinka mid ah oo jirran ama safar ku jira wuxuu soomayaa maalmo kale (bedelka maalmaha uu afuray)."

- **Qallaynta soonka**

Su'aasha 5aad: Gabar ayaa waxay leedahay intii soonku igu waajibay waan soomayey bisha Ramadaan hase yeeshee ma aanan qallayn jirin maalmaha iga taga inta aan macduurka ahay, waxayna imminka doonaysaa inay ogaato xukunka sharciga ah ee arrintaas ka ratibmaya iyo waxa ku waajibka ah iyadoon aqoon tirada maalmahaas ay afurtay?

Jawaab: Run ahaantii waa arrin laga murugoodo in sidaas oo kale ay yeelaan hablaha muslimiinta ah, sababta arrintaas keentayna waa laba middood, jaahilnimo ama fududaysi labadooduna waa laba musiibo, sababtoo ah jaahilnimada daawaynteedu waa in wax la barto iyo in culimada wax la weydiiyo, fududaysiga gudashada cibaadooyinkana waxaa daawo u ah Allaah oo laga cabsado ciqaabkiisana laga digtoonaado laguna dadaalo wixii raalli galinaya.

Waxaa ku waajiba haweeneydaas inay Allaah u toobad keento dambi dhaafna ka weydiisato wixii ay fashay ayna ku dadaasho hadba sidii ay awooddo inay u soonto ilaa ay ka xaqiijinayso inay soontay maalmihii lagu lahaa oo dhan, waxaana rajaynayaa inuu Alle subxaanahu wa tacaalaa uu toobaddeeda ka aqbalayo.

- **Daahir noqoshada salaadda subax gadaasheeda**

Su'aasha 6aad: Haddii haweentu ay daahir noqoto oo mayrato salaadda subax kaddib, isla markaasna ay salaaddii tukato ayna soonto maalintaas miyay qallaynaysaa?

Jawaab: Haddii ay haweentu dhiigga ka daahir noqoto dillaaca waaga wax yar ka hor daqiiqadna ha noqotee ayna xaqiijiso inay daahir noqotay way soomaysaa haddii ay Ramadaan tahay, dibna u qallayn mayso maalintaas waayo waxay soontay iyadoo daahir ah dhibna malahan haddii aysan qubaysan ilaa salaadda subax laga gaaro, sida ninkuba marka uu galmood sameeyo ama uu isku junuubo aysan dhib u lahayn inuu suxuurto kaddibna salaadda subax u soo gasho isagoo qasligii aan ka mayran.

Waxaan rabaa haweenka in aan ku baraarujiyo arrin kale oo ah: Haweenka qaarkood haddii ay dhiig helaan afurka kaddib intaysan cishaha tukan waxay u maleeyaan in soonkoodii maalintaas ka buray, arrintaasna mid asal leh ma ahan balse haddii ay dhiig hesho qorraxdu markay dhacdo, daqiiqad kaddibna ha ahaatee soonkeedii waa u jiraa.

SAKADA

- **Sakada meherka**

Su'aasha 1aad: Naag ayaa meherkeedii lagala daahay oo ninkeedu aanu siin, laba sano kaddib ayuuna siiyey, haddaba miyay seko ka bixinaysaa sanadihii tagey, mise marka meherka la siiyo oo ay sano ka soo wareegto bay seko bixinaysaa?

Jawaab: Mas'aladaan culimadu way isku khilaafeen qaarkood waxay qabaan sida Imaamu Axmed iyo Imaamu Shaafici iyo qaar kale in sako la bixinayo labadii sano ee tagey, xaalad kasta oo uu ninku ku sugnaa, waxay kaloo yiraahdeen, sanadihii tagey sako ayaa la bixinayaa haddii uu ninku awood u lahaa, oo uu xoolahaas hayey.

Imaamu Maalik iyo Imaamu Axmed waxay yiraahdeen hal sano ayaa waajib ah in la bixiyo sanadihii tagey, waxaa kaloo laga wariyey Abuu Xaniifa iyo Axmed inay yiraahdeen, waxba laga bixin mayo sanadihii tagay si kastoo ay xaaladdu ahayd.

Waxaa u daciifsan qolada waajibisey in sako la bixiyo sanadihii tagey, xataa haddii aan maalkaasi ninka gacan ugu jirin oo aanu hayn, waana qowl baadil ah, waajibintaas lagu waajibiyey wax aan gacan ugu jirin shareecada kuma bannaana, haddii waqtiga maalkaas haweenta ka maqan yahay dheeraado markaas sekadii ayaaba maalkii ka badanaysa.

Waxaa xaq u dhow qolada tiri sako lama bixinayo sannadihii tagey, ilaa meherkeeda la siiyo oo ay sano ka soo wareegto, ama qoladii tiri sanadihii tagey hal mar ayaa sako laga bixinayaa marka uu maalku gacanteeda soo galo, waana sida ay yiraahdeen, Maalik iyo Abii Xaniifa iyo Axmed oo labada qawlba wax ku leh.

- **Waxaan haystaa dahab aanan sako ka bixin shan sano**

Su'aasha 2aad: Haweeney ayaa haysatey in muddo ah dahab gaaray xadkii Sakada, waxayna ogaatay inay sako ku waajibtay shan sano kaddib, markii ay ogaatay arrintaas waxay doontay inay sekadii bixiso hase yeeshee ma ay haysan wax lacag ah oo ay dahabka sekada uga guddo inay dahabka qudhiisa qaar ka iibiso oo sekada ku guddo mooyaane, haddaba sidee ayay u gudaysaa sannadihii tagey sakadoodii? Dahabka miyay qaar iibinaysaa? Sanooyinka soo socda sidee ayay u bixinaysaa?

Haddii ay isku daydo inay hal mar guddo sekada sannadihii shanta ahaa ee la soo dhaafay ma awooddo inay dahabka qaarkiis iibiso sannad kasta mooyaane, wax kale oo dakhli ahna ma soo galo ha yaraado ama ha badnaadee?

Jawaab: Waxaa ku waajiba inay sekada bixiso sannadaha soo socda haddii dahabkeedu gaaro xadkii sekadu ku waajibaysey, xadkaas oo ah 92 garaam culumada qaarna waxay leeyihiin 85grm, waana inay sekadaas waajibka ah bixiso xataa haddii ay wax kale weydo waxay iibinaysaa dahabka qaarkiis ama hanti kale oo ay leedahay si ay sekada u bixiso, haddii ninkeeda ama aabbaheed ka bixiyo iyadoo laga idan qaatay dhib kuma sugna wayna ka gudaysaa, haddiise aysan sidaas yeelin sekadii dayn ayay ku ahaanaysaa ilaa ay ka guddo.

Sanadihii la soo dhaafay oo aysan ogayn waajibnimada sekada waxba ma bixinayso maadaama ay jaahil ka ahayd xukunkaas, culimada qaarkood iyagu waxayba qabaan in aan seko ku waajibin dahabka loo haysto in la xirto oo la isku qurxiyo ee ganacsiga ahayn, laakiin sida raajixa ah dahabku haddii uu seko gooyo sannadna ka soo wareego seko ayaa ku waajibaysa sida ku xusan kitaabka Allaah iyo sunnada Nabiga.

- **Sekada Dahabka**

Su'aasha 3aad: Seko ma laga doonayaa dahabka ay dumarku u haystaan inay isku qurxiyaan oo ay xafladaha ku tagaan?

Jawaab: Sida saxiixa ah sakadu waajib ayay ku tahay dahabka haweentu ku labisato Allaahna wuxuu yiri:

(Kuwa kaydsada dahabka iyo fiddada oon ku bixinayn jidka Alle ugu bishaaree cadaab daran.)

Nabigu wuxuu yiri:

(Qof kasta oo dahab haysta oo aan ka gudin xaqii lagu lahaa maalinta qiyaamaha waxaa dahabkii laga dhigaa sida alwaaxyo balballaaran oo kale markaa ayaa lagu soo kululeeyaa naarta Jahannamo kaddibna waxaa looga feereeyaa dhinacyada iyo wajiga iyo dhabarkaba, markastoo ay qabowdo waa lagu celiyaa, maalin dhererkeedu le'eg yahay konton kun oo sano illaa dadka la kala xukminayo, kaddibna waxaa la tusayaa jidkiisii oo janno ah ama naar ah.)

Axaadiista sida gaarka uga hadashay dahabka iyo waxyaalaha la xidho waxaa ka mid ah xadiiskii Cabdullaahi ibnu Cumar ibnu Caas uu kaga warramayey qisadii haweeney Nabiga u timid iyadoo ay la socoto gabar yar oo ay dhashay oo gacanta laba jinjimood oo dahab ahi ugu jireen. Rasuulku wuxuu yiri: "Dahabkaan sakada maka bixisaa?" Waxay tiri, "Maya." Markaasuu Rasuulku yiri, "Maku farxi lahayd in Alle kuu xiro iyagoo naar ah?"

Ibnu Xajar isagoo xadiiskaas ka warramaya inuu saxiix yahay ayuu kitaabkiisa Buluuq Al-Maraam wuxuu ku yiri, "Senedkiisu waa xoog badan yahay," wuxuuna sheegay axaadiis kale oo u markhaati kacaysa.

Waxaan halkaas ka garanaynaa in sida raajixa ah ay sakadu ku waajibayso dahabka ama qalinka ay haweenku quruxda u haystaan haddii ay gaaraan qaddarka sakada lagu bixiyo kaas oo ah 85 garaam dahabka, qalinku waxaa sako laga bixinayaa markii culayskiisu u dhigmi karo 56 riyaal oo Sucuudi ah oo qadaadiic ah (595 garaam), sidaas darteed haweentii haysata dahab gaaraya 85 garaam seko ayaa ku waajibtay inay ka bixiso, haddii munaasabadaha kaliya ay u labisato iyo haddii ay mar kastaba labisatana waa isku mid

- **Dahabkeedii ayay iibisey iyadoon sakadii ka bixin**

Su'aasha 4aad: Waxaan iibiyey dahab aan muddo isticmaalayey anigoon sakadii ka gudin. Waxaan idinka rajaynayaa in aad ii bayaanisaan sida ay noqonayso dahabkaas sakadiisu, waxaana dahabkaas ku iibiyey afar kun oo Riyaal Sacuudi ah?

Jawaab: Haddii aad jaahil ka ahayd oo aadan ogayn in dahabkaas sako ku waajibtay ilaa aad ka iibisey waxba laguu raacan mayo, laakiin haddii aad ogayd in sako ku waajibtay markaas lacagta aad ka bixisay dahabka ayaad sako ka bixinaysaa, sakadaas oo ah kunkiiba 25 halkii sano, sanooyinkii tageyna waa sidoo kale iyadoo loo eegayo hadba qiimaha uu dahabku suuqa ka joogey, waxaana waajiba in laga bixiyo (rubucul cushur), iyadoo lagu bixinayo sakada lacag ka mid ah lacagaha la yaqaan, haddii waajibnimada sakada aad ogaatay sannadkii ugu dambeeyey markaas waxaad bixinaysaa sakada sannadkii ugu dambeeyey oo keliya.

- **Sakada oo la siiyo hooyada**

Su'aasha 5aad: Ma bannaan tahay in qofku sakadiisa siiyo hooyadiis?

Jawaab: Ruuxa Muslimka ah uma bannaana inuu sakada siiyo waalidiintiis iyo caruurtiisa, waxaana ku waajiba inuu ka quudiyo maalkiisa haddii ay u baahan yihiin isaguna uu awoodo.

XAJKA/CUMRADA

- **Haweenta caadada qabta iyo labada ragcadood ee Ixraamka**

Su'aasha 1aad: Sidee ayay u tukanaysaa haweeney caado qabta labada ragcadood ee ixraamka?

Jawaab: Haweenta caadada qabtaa ma tukanayso labada ragcadood ee Ixraamka waxayna ixraamanaysaa salaad la'aan, ragcadahaasina waajib ma ahan ee waa sunno, ahlu cilmiga qaarkood waxay qabaan inaysan xataa sunno ahayn, sababtoo ah Rasuulka lagama warin wax salaad ah inuu ku khaas yeelay ixraamashada, jamhuurka culimadu waxay qabaan inay sunne tahay waxayna soo daliilsadeen axaadiis sheegaysa in Ilaahay Nabiga ku yiri:

(Ku tuko waadigaan barakaysan oo dheh cumro iyo xaj wada jira.)

Waadigaasi waa Al-Catiiq, markaasna waxay ahayd xajkii sagootinta oo ahaa xajkii ugu dambeeyey ee Nabigu xajiyo, saxaabada qaarkoodna waxaa laga wariyey inuu Nabigu tukaday kaddibna ixraamtay, sidaas darteed ayay jamhuurku u arkaan inay sunne tahay in la ixraamto salaad gadaasheed, salaaddaasi sunne iyo waajib middii ay doonto ha noqoto, haweenka dhiigga qaba maadaama salaad aysan tukanayn waxay ixraamanayaan salaad la'aan, mana qallaynayaan labadaas ragcadood markii ay daahir noqdaan.

- **Nin haween taabtay isagoo dawaafaya**

Su'aasha 2aad: Nin ayaa isagoo dawaafaya xajka dawaafkiisii, meeshana aad la isigu ciriirinayo wuxuu jirkiisu taabtay haween jirkeed haddaba dawaafkiisii ma ka burayaa, sida weysada oo kale?

Jawaab: Sida saxiixa ah dawaafka iyo weysada midna kuma burayo haween taabashadeed haddii ay meeshu ciriiri tahay iyo haddii kaleba, in kastoo culimadu ka doodeen taabashada dumarka inay weysadu ku burayso iyo in kale, waxay kala yiraahdeen weysadu way ku buraysaa iyo kuma burayso, iyo way ku buraysaa haddii shahwo ahaan loo taabto, waxaana ugu raajixsan inaysan weesadu ku burayn.

Ninku haddii uu naag taabto ama uu dhunkado weysadu kama burayso sida saxiixa ah, sababtoo ah Rasuulku intuu haweenkiisa qaar ka mid ah dhunkaday ayuu haddana tukaday isagoon weysaysan, waxayna arrintaasi daliil cad u tahay weysadu inaysan taabasho iyo dhunkasho toona ku burayn, mana bannaana in la yiraahdo weyso ayay burinaysaa in daliil cad loo keeno mooyaane, daliilkaas oo tusinaya in haweenka taabashadooda oo idil weysadu ku burayso.

Taabashada haweenka ee aayaddu sheegtay waxaa loola jeedaa galmood (jimaac), Ibnu Cabbaas iyo jamaaco kalena waxay yiraahdeen macnaha aayadda waxaa loola jeedaa galmoodka, mana aha taabasho kaliya sida uu wariyo Ibnu Mascuud sida saxiixa ahna waa in aayadda macnaheeda loola jeedo galmoodka, sida uu yiri Ibnu Cabbaas iyo koox kale oo culimada ka mid ah.

Waxaan halkaas ka ogaannay ninkii haween taabta isagoo dawaafaya in dawaafkiisu ansaxayo weysaduna aanay ka burayn haddii ibtiisa aan wax qoyaan ahi ka iman.

- **Dhiig ayay heshay intaysan cumradii dhammaystiran umana suurta gelayso inay sugto inta ay daahir noqonayso**

Su'aasha 3aad: Naag ayaan u soo kaxeeyey Cumro, markii aan Makka soo gaarnay ayay dhiig caado heshay, anigana iima suurta gelayso in aan sugo inta ay daahir ka noqonayso, cid kalena Makka uma joogto, see ayuu xukunkeedu noqonayaa?

Jawaab: Haddiii ay arrintu sidaas u dhacday haweentuna aysan Makka ku lahayn maxram, ninkii wadeyna aysan duruuftu u saamaxayn inuu sugo intay ka daahir noqonayso, markaas shardigii daahir ahaanshuhu meesha waa ka baxayaa, waxayna xiranaysaa suufka dhiigga loo xirto (timbooni), kaddibna waxay la imanaysaa dawaafkii iyo sacyigii Safa iyo Marwa sidaas ayayna cumradeedii ku dhammaystiranaysaa, haddiise meesha ay ka timid dhowdahay ama duruuftu dhaqaale ahaan u saamaxayso waxaa haboon inay soo noqoto iyadoo maxram ama ninkeedu la socodo markii ay daahir noqoto, markaasna ay dhammaystirato dawaafkii cumrada iyadoo daahir ah.

Allaah subxaanahu watacaalaa wuxuu yiri:

(Allaah fudayd buu idinla doonayaa ee culays idinla dooni mayo.)

Wuxuu kaloo Alle yiri:

(Allaah ruuxna kuma kallifo wax uu awoodo mooyee.)

Aayad kale wuxuu Alle ku yiri:

(Diinta kama yeelin dhib.)

Wuxuu kaloo Alle yiri:

(Allaah ka cabsada intaad kartaan.)

Rasuulkuna wuxuu yiri:

(Haddii aan amar idin faro, intii aad kartaan ka sameeya.)

Wayna badan yihiin aayadaha iyo axaadiista tilmaamaysa fududaynta dadka loo fududeeyey wixii caqabad ku noqda ee is hortaaga, waxaana sidaas qaba koox ahlu cilmiga ka mid ah sida Ibnu Taymiya iyo ardaygiisii Ibnu Qayim (Allaah ha u naxariistee).

- **Gabar caado heshay oo ka xishootay inay sheegto oo xajiday**

Su'aasha 4aad: Gabar ayaa waxay sheegtay inay soo xajiday isla markaana ay caado heshay, kaddibna ay ka xishootay inay u sheegto dadkii ay la socotay oo dawaafkii iyo sacyigii ay martay, haddaba maxaa ku waajiba oo laga doonayaa?

Jawaab: Uma bannaana haweeney qabta dhiig caado iyo mid dhalmo inay salaad tukato iyadoo ku sugan Makkah Al-Mukarramah ama waddankeeda ama meel kaloo ay noqotaba waxaana u daliil ah qawlkii Nabiga ee ahaa:

(Miyaysan salaadda iyo soonka ka tagin markii ay caado hesho [haweentu].)

Muslimiintu way isku raacsan yihiin inaysan u bannaanayn haweeney dhiig qabta soon iyo salaad toona, gabadha ficilkan samaysay waa inay Allaah u toobad keento oo ay dambi dhaaf weydiisato, dawaafkiii ay Kacbada dawaaftayna waa midaan ansax ahayn, sacyigii Safwa iyo Marwa ee ay martayse waa u jiraa oo sida saxiixa ah way bannaan tahay in sacyiga dawaafka laga soo hor mariyo marka la xajinayo, waxaana ku waajiba inay ku celiso dawaafkii xajka sababtoo ah Dawaafka Ifaadadu (Dawaafka Xajka) waa rukni ka mid ah arkaanta xajka qofkuna aanu xajkiisa si buuxda uga xalaaloobi karin la'aantiis, sidoo kale haddii la qabo ninkeedu uma galmoon karo haddii ay inan tahayna lama nikaaxin karo ilaa ay dawaafkii xajka ku celiso.

- **Qof maal leh oo geeriyooday isagoon xajkii gudan**

Su'aasha 5aad: Haweeney ayaa geeriyootay iyadoon xajiyin waxayna ka tagtay maal iyadoo ay joogaan ninkeedii iyo aabbaheed iyo walaalaheed waxayna isku khilaafeen in maalka laga bixiyo intaan la qaybin lacag loogu xajiyo iyo in kale waxayna door bideen inay culimada waydiiyaan, waxayna idin ka doonayaan jawaab?

Jawaab: Haddii sida aad u sheegtay arrintu tahay waxay ka bixinayaan maalka wax ku filan in loogu xajiyo oo loogu cumraysto, waase haddii ay awood u lahayd markii ay noolayd inay xajido, haddiise ay faqiir ahayd oo aanay awoodin, kuma waajibayo xaj iyo cumro toona, maalka ay ka tagtay haddii dayn lagu lahaa dayntaa laga bixinayaa wixii soo harana waxaa laga dhigayaa laba qaybood ninkeedu nus buu qaadanayaa inta soo hartana aabbahaa la siinayaa, walaaluhuna waxba kuma lahan aabbahaana ka hor istaagay dhaxalka.

UDXIYADA

- **Udxiyada haweenku way qali karaan**

Su'aasha 1aad: Haddii la gaaro xilligii udxiyada reerkana ninkii uu ka maqan yahay, ma u bannaan tahay haweenta inay udxiyadii qasho?

Jawaab: Way u bannaan tahay inay haweentu udxiyada qasho, haddii ay duruufi keento, lana buuxiyo shuruudihii kale ee udxiyada.

Waxaa sunne ah marka la biraynayo in la magacaabo qofka laga qalayo udxiyadaas, haddii aan la magacaabin oo qalbiga laga niyaysto dhib ma lahan oo way ansaxaysaa, haddii qofkii laga qalayey qof aan ahayn si aan ula kac ahayn loogu magacaabo, iyaduna way ansaxaysaa oo Alle niyadda ayuu daalacanayaa.

- **Shanlaysiga timaha qof doonaya inuu Udxiyo qalo**

Su'aasha 2aad: Haweentu haddii ay doonayso inay udxiyada xoolo qasho, waajib miyay ku tahay inaysan shanlayn timaheeda, iyadoo waliba dhibaato kala kulmaysa shanlo la'aanta tobankaas maalmood?

Jawaab: Waxaa jira xadiis saxiix ah oo Ummu Salama Alle ha ka raalli noqdee laga wariyey inuu Nabiga yiri:

(Haddii la gaaro tobanka maalmood [ee Dul-Xijjah ugu horraysa] oo qofkiin doono in uu udxiyaysto, yaanu waxba ka goyn timihiisa iyo jirkiisa.)

Warin kale ayaa waxay ahayd:

(Ha daysto timihiisa iyo ciddiyihiisa.)

Culimadu waxay yiraahdeen: Ujeeddadu waa in aan timaha la suulin sida in la xiiro ama la gooyo ama la gubo iyo wixi la mid ah, sidaas awgeed shanlaynta iyo timaha oo la hagaajiyo ma soo galayaan waxa la diiday, sidoo kale waa la mayri karaa timaha oo la kala bixin karaa, haddii sidaas timo ku go'aan iyadoon loola qasdin dhib ma keenayso, haween tana way u bannaan tahay inay timaha shanlaysato haddii ay u baahato waana isku mid udxiyadaasi inay tahay mid sunne ah ama aan ahayn.

GUURKA

- **Shardiga u wakiilashada nikaaxa qof kale**

Su'aasha 1aad: Nin doonaya inuu isu guuriyo gabar uu waligeeda yahay miyay u bannaan tahay inuu qof kale u wakiisho? Shardi miyaa in la magacaabo ninka marka wakiilka la samaynayo? Haddii ay bannaan tahay guurka in wakiil loo sameeyo, maxay tahay shuruudda laga doonayo?

Jawaab: Way bannaan tahay in la samaysto qof nikaaxa kaaga wakiil noqda waxaadna oranaysaa hebel baan u wakiishay inuu igu nikaaxiyo heblaaya, waana inuu gabadha magaceeda sheego, mana ahan inuu yiraahdo waxaan kuu wakiishay in aad gabar ii soo raadisid oo ii meherisid, sababtoo ah arrintaas mugdi baa ku jira (jahli) waxaana ka iman kara dhibaato iyo iyadoo la is dhagro, hadhoowna ay ka dambayso qoomamo iyo labadii la isu guuriyey oo gurigoodii halkaas ku dumo, sababtoo ah ninka wakiilka laga dhigtay wax kasta oo isaga la fiican oo uu ku qanacsan yahay, waxaa la arkaa ninkii isaga wakiishay inuusan sidaas u arkin (ama uu sidaas cagsigeeda u arko), sidaas darteed waxaa daruuri ah inuu magacaabo haweenta loo nikaaxinayo.

Sidoo kale ninka gabadha wilaayadeeda hayaa wuxuu samaysan karaa wakiil isagoo oranayo waxaan kuu wakiishay in aad gabadhaan ku nikaaxiso hebel, isagoo ninka magiciisa sheegaya, waana inuu wakiilku ninkaas garanayo gabadhuna ay ka raali tahay ayna garanayso.

Waxaa halkaas nooga caddaatay inay bannaan tahay ninku inuu samaysto wakiil uga wakiil ah nikaaxiisa ama wilaayada gabadha uu wilaayadeeda hayo.

Shardiga wakiilku waa inuu yahay nin istaahila in arrintaas loo wakiisho oo caqli leh, mana bannaana in haweeney arrintaas loo wakiisho sababtoo ah haweentu iyadu isuma guurin karto.

- **Muxuu Islaamku ka qabaa xaddaynta taranka iyo nidaamintiisa?**

Su'aasha 2aad: Ma bannaan tahay ruux Muslim ah inuu raaco hababka loo adeegsado kala fogeynta dhalmada?

Jawaab: Shareecada Islaamku waxay aad u dhiirri gelisey in taranka la badiyo waxayna ku tirisay inuu ka mid yahay nicmooyinka waaweyn ee Alle dadka ugu gallad sheegto, dhalmda in la joojiyo ama la kala fogeeyaana waa arrin dhan ka ah abuurista Allaah iyo shareecada Islaamka ee uu Rabbi uga raalli noqday addoomadiisa, waana arrin salka ku haysa oo ay soo abaabuleen dad Islaamka cadow ku ah, waana caado jaahilnimo ah mana bannaana in dhalmada la xannibo haddii aysan duruufi keenin, sida haddii ay haweentu ku dhib mudanayso oo aanay si caadi ah u dhali karin in la qalo mooyaane, ama

inay tabar daran tahay oo aysan xamili karin uurka sannad kasta oo markaas loo baahdo in la kala fogeeyo dhalmadeeda.

Culimada fiqigu waxay banneeyeen haddii haweentu uur qaaddo iyadoon tabar u hayn oo xannuunsan nafteedana loo baqo isla markaana la dareemo uurkaas iyadoo aan afartan bari ka soo wareegin, in la siin karo daawo baabi'isa oo soo ridda uurkaas, waxaana dhacda in ay waajib noqoto in haweenta laga hor istaago uuraysiga marmarka qaarkood, waana marka si dhab ah loo sugo inay halis ku galayso haddii ay uuraysato.

- **Nin diin leh baa isoo doonay laakiin hooyaday ayaa iga hor istaagtey**

Su'aasha 3aad: Waxaan ahay gabar 24 sano jir ah waxaana isoo doonay inan diin leh oo ka qalin jabiyey jaamacad kana dhashay reer ahlu diin ah, aabbahay wuu ka raalli noqday wuxuuna iga codsaday in aan la kulmo, waan la kulmay oo inta is aragnay sida ay diintu oggoshahay baan isku qanacnay, markii ay hooyaday arrinta ogaatay way dhaaratay oo geed dheer iyo mid gaabanba waxay u fuushay in aan ninkaasi iguursan, aabbahay arrinta inuu xalliyo ayuu isku dayey, wuuse ku guul darraystay, haddaba xaq ma u leeyahay in aan sharciga la tiigsado, si arrintayda wax looga qabto?

Jawaab: Arrintu sida ay gabadhu sheegayso hadday tahay, hooyadu xaq uma lahan inay is hortaagto waana ka xaaraan kumana addeecaysid hooyadaa is hortaaggaas, Nabiguna wuxuu yiri:

(Waxaa la isku addeecaa wanaagga.)

Wanaagguna ma ahan gabar nin kufkeed ah soo doonay in loo diido, waxaa kaloo Nabiga laga wariyey inuu yiri:

(Haddii uu guur idinka soo doono nin aad diintiisa iyo dabcigiisaba ka raalli tihiin u guuriya, haddiise aad sidaas yeeli weydaan waxaa dhulka ka dhacaya fitno iyo fasahaad weyn.)

Wayna u bannaan tahay haddii ay gabadhu ka fursan weydo inay maxkamadda u bandhigto arrinkeeda.

- **Xaamilada guurkeeda ilaaay ka dhasho**

Su'aasha 4aad: Maxay diintu ka qabtaa in la guursado naag garoob ah iyadoo uur leh oo waliba uurkaasi uu yahay mid ay sino ku keentay, haddiise la nikaaxiyo nikaaxu ma ansaxayaa?

Jawaab: Ninkii nikaaxsada haweeney garac riman, nikaaxaas wax kama jiraan, mana ansaxaayo, waana ka xaaraan inuu u galmoodo, Allaahna kor ahaaye wuxuu yiri:

(Ha u qasdina in aad nikaaxisaan ilaa ciddadu dhammaato.)

Wuxuu kaloo yiri:

(Haweenka uurka leh ciddadoodu waa inay umulaan (dhalaan).) Rasuulkuna wuxu yiri:

(Uma bannaana qof rumaysan Allaah iyo maalinta qiyaamaha inuu manidiisa ku waraabiyo beer aanu lahayn [macnaha waa inuusan u galmoon haweeney uur leh oo aanu isagu uurayn].) Imaamu Maalik iyo Axmed sidaas ayay yiraahdeen, Imaamu Shaafici iyo Abuu Xaniifa waxay yiraaahdeen wuu ansaxayaa, wuxuuse Abuu Xaniifa xaaraantinimeeyey in loo galmoodo ilaa ay ka dhalayso, Imaamu

Shaafici wuu banneeyey in loo galmoodo wuxuuna yiri: Manida saanigu wax xurmo ah ma lahan, ilmaha uu xaaraanta ku dhalayna kuma abtirsanayaan nasabna ku raaci mayaan, Rasuulkuna wuxuu yiri:

Macnaha waxba ma helayo ilmaha uu sinada ku dhalay dadka ugama sokeeyo xaqna kuma leh. Sidoo kale ilmahaasi abtirsi kuma raacayaan ninka guursaday haweenta oo uur leh, waayo wuxuu guursaday iyadoo cid kale soo uuraysay.

- **Nin jirran guurkiisu ma ansaxayaa**

Su'aasha 5aad: Ma ansaxayaa guurka nin loo guuriyey isagoo xanuunsan?

Jawaab: Nin jirran guurkiisu waa ansaxayaa haweentuna way dhaxlaysaa sida ay qabaan jamhuurka culimadu oo ay ka mid yihiin saxaabadii iyo taabiciintii, waxaana meher loo siinayaa meherka dhex-dhexaadka ah ee loo badan yahay, lagamana badin karo siday culimadu isku waafaqsan yihiin.

- **Guurka naag la furay oo aan dhiig helin muddo siddeed bilood ah**

Su'aasha 6aad: Nin ayaa xaaskiisii furay iyadoo wiil u nuujinaysa waxayna kala maqnaayeen siddeed bilood, kaddibna nin kale ayaa guursaday, waxayna is qabeen muddo dhan intay hal dhiig ka hesho, kaddibna wuu furay waxayna joogtay saddex bilood, wax dhiig ahna ma ay helin siddeedii bilood oo hore iyo intii ninka labaad qabey iyo saddexdii bilood ee u dambeyseyba, kaddib waxaa guursaday ninkii hore ee ay wiilka u haysey, haddaba guurkaas maxaa ka ansaxaya?

Jawaab: Ma ansaxayo guurkii hore iyo kan labaadba waxaana ku waajib ah inay furniinkii hore ciddadiisa dhammaysato kaddibna furniinkii labaad ay ciddadiisa dhamaysato, labadaas ciddo markay dhammaysato kaddib ay guursato ciddii ay doonto.

- **Shardiga la kala xirto marka la is guursanayo**

Su'aasha 7aad: Nin ayaa haweenay guursaday waxayna shardi ka dhigatay markii la nikaaxinayey inuusan naag kale la guursan, guriga ay deggan tahayna ka rarin, waxaa jirtey gabar ay dhashay oo ay shardi uga dhigtay inay la noolaato gabadhaasi wuuna ku waafaqay, haddaba waajib miyay ku tahay inuu oofiyo ballantaas, haddiise uu ballantaas ka baxo haweentu ma ka furmaysaa?

Jawaab: Waa ansaxayaan shardiyada la kala xirto markii nikaax dhacayo iyaga iyo wixii la mid ahba, waxaana sidaas qaba mad-habta Imaamu Axmed iyo kuwo kale, sida qaar ka mid ah saxaabadii iyo taabiciintii, taabicu-taabiciintii, sida Cumar ibnu Khaddaab, Camr ibnul Caas, Shurayx Al-Qaaddi, iyo Awsaaci.

Mad-habta Maalikiyadu waxay qabtaa haddii ay shardisato in furniinkeeda iyadu gacanta ku hayso (markii ay doonto is furto) in shardigaasi ansaxayo, Imaamu Axmedna sidaas oo kale ayaa laga wariyey.

Bukhaari iyo Muslim waxay ka wariyeen Nabiga inuu yiri:

(Shardiyada waxaa ugu xaq mudan in la oofiyo shardiga la kala dhigto marka la is guursanayo.)

Cumar bin Khaddaab wuxuu yiri:

“Nabigu haweenka waxa lagu xalaalaysanayo farjigooda ayuu ka dhigay tan u xaq mudan shuruudaha in la oofiyo.”

- **Xukunka in haweenka gadaal looga tago**

Su’aasha 8aad: Nin ayaa xaaskiisa ka dalbaday inuu gadaal (dabada) uga galmoodo, haddaba ficilkaas maxay diintu ka qabtaa?

Jawaab: Ficilkaasi waa mid aad u xun oo munkar ah, (oo aan diinta Islaamka ku bannaanayn) Abuu Daawuud iyo Nasaa’i iyo qayrkoodba waxay Nabiga ka wariyeen inuu yiri:

(Lacnadi haku dhacdo ninkii haweentiisa gadaal uga galmooda.)

- **Nin gabar guursaday kaddibna arkay inaysan bikro ahayn**

Su’aasha 9aad: Nin ayaa gabar guursaday isagoo moodaya inay bikro tahay kaddibna waxaa u caddaatay inay garoob tahay oo aanay bikro ahayn, haddaba ma fasakhi karaa nikaaxaas?

Jawaab: Wuu ka noqon karaa nikaaxaas wuxuuna xaq u leeyahay inuu dalbado in la siiyo meherkii uu bixiyey beddelkiisii oo ah faraqa u dhexeeya bikrada iyo garoobka haddiise uu fasakho intuusan la aqal gelin meher ma uu bixinayo.

- **Meherka gabadhaa iska leh qof kale uma bannaana inuu ku tagri falo iyadoon ka raali ahayn**

Su’aasha 10aad: Miyay bannaan tahay inuu ninku ku aqal dhisto meherka gabadhiisa ama walaashiis?

Jawaab: Meherku waa xaq ay gabdhuhu leeyihiin waana qayb maalkooda ka mid ah haddiise ay u hibayso ama ay ugu abaal guddo aabbaheed iyadoon la qasbin way bannaan tahay, haddiise aysan u hibayn uma bannaana inuu wax ka qaato waayo iyada ayaa gaar u leh hantidaas, aabbaheedna wuxuu si gaar ah xaq ugu leeyahay inuu maalkaas ka qaato waxaan iyada dhibayn awlaaddiisa qaar ka mid ahna waa inuusan ku gooni yeelin, sida Nabiga laga wariyey inuu yiri:

(Cuntadiinna waxaa ugu wanaagsan tan aad shaqaysataan, carruurtiinuna waxay ka mid yihiin waxaad shaqaysateen).

- **Suldaanku wali ma u noqon karaa haweeneydii aan wali lahayn?**

Su'aasha 11aad: Gabar ayaa waxay gaartay da'dii guurka mana ay lahan cid ka mas'uul ah oo walaayadeeda haysa, magaaladana qaaddi ma joogo haddaba duqa magaaladu booskii qaadiga ma geli karaa?

Jawaab: Ruuxa dumarka ah waxaa u xaq mudan wilaayadeeda aabbaheed, waxaana ku xiga awoowgeed iyo awoowayaasheed haddii la helayo haddii kuwaas la waayana waxaa ku xiga wiilkeeda iyo wixii raga ah ee isaga ka farcama, waxaa ku sii xiga walaalkeeda ay isku aabbe iyo hooyo yihiin waxaana ku sii xiga walaalkeed ay isku aabbe yihiin intaas kaddibna qaraabadeeda siday ugu kala dhow yihiin oo ay dhaxalka u kala leeyihiin bay isugu xigsanayaan, haddii intaas la waayo waxaa wilaayadeeda qaadaya suldaanka waxaana naa'ib ka noqonaya maxkamadda sharciga ah ninka mas'uulka ah, (qaalliga magaalada).

Duqa maqaalada dawladda ayaa u xilsaartay in uu wakiil uga yahay arrimaha maamulka ee magaaladaas waana kan wakiilka ka ah oo fuliya wixii xukun ah oo la fulinayo.

Waxaa halkaas nooga caddaatay in haweeneydii aan wali lahayn duqa magaaladu aanu qaadi karin wilaayadeeda, balse xilkaas loo dhiibayo qaaddiga sharciga ah, mana jiro magaalo waddankeenna ka mid ah oo qaaddi lahayn, haddii aysan lahaynna magaalada ay hoos timaaddo ayaa qaadigii joogaa sida qaalibka ah.

- **Meherka**

Su'aasha 12aad: Haween ayaa waxay ninkeeda ku lahayd meherkeedii, waxayna u cafiday markii ay dhimanaysey, waxaa markhaati ka ahaa arrintaas nin lagu kalsoon yahay iyo naago, waxayna hortooda ka qirtay inay ninkeeda u cafidey meherkeedii, haddaba arrintaasi ma ansaxaysaa?

Jawaab: Ma ansaxayso cafintaasi ilaa dadkii dhaxalka lahaa ay u cafiyaan, maadaama ay u cafiday markii ay dhimanaysey (oo maalkeedu dhaxal wareegayey) iyadoo aan horay u cafin intii ay caafimaadka qabtey.

Haddiise ay u cafiso iyadoo caafimaad qabta way ansaxaysaa, markhaatiguna sida ay sheegeen imaamyada Shaafici iyo Maalik iyo Axmed wuu ku ansaxayaa hal nin iyo dhaar (lagu kabo), sidoo kalena Imaamu Maalik wuxuu sheegay inuu ku ansixi karo laba naagood iyo dhaar (lagu kabo), haddiise markay dhimanayso ay sheegto inay ninkeeda meherkii horay ugu cafiday intay caafimaadka qabtey lagama aqbalayo sida ay qabaan, Abii Xaniifa iyo Axmed iyo culimo kale, Imaamu Shaaficina wuxuu qabaa in laga aqbalo.

Nabigu wuxuu yiri:

(Allaah qof kasta xaqiisii waa uu siiyey, ee yaan loo dar daarmin (wax dheeraad ah in la siiyo) qof dhaxalka wax ku leh.)

Qofka bukaanka ah uma bannaana inuu qof dhaxalka wax ku leh siiyo intii Allaah siiyey in ka badan.

- **Naagta lala baxo nikaax cusub ayaa lagu celinayaa**

Su'aasha 13aad: Gabar ayaa la guursaday iyadoon la ogaysiin ama idan laga qaadan ehelkeeda, culimada Soomaalida qaarkood waxay yiraahdaan haddii naag la nikaaxiyo iyadoon ehelkeed laga idan qaadan nikaaxaasi waa baadil wixii ay isugu tagaanna waa sino haddii masaafo 100 kiilomitir ah

aysan u jirin meesha gabadha lagu meheriyey ehelkeedii, haddaba Islaamku muxuu arrintaas ka qabaa?

Jawaab: Nikaaxa waxaa shardi looga dhigay joogitaanka mas'uulkeeda waliga u noqon kara sida ay jamhuurka culimadu qabaan, haweentu wilaayadeeda ma haysan karto haween kalena weli uma noqon karto, wilaayada waxaa iska leh aabbaheed haddii la waayana ehelkeeda kale ayaa hadba siday ugu kala dhow yihiin wilaayadeeda u qaadaya, haddii ehelkeeda la waayo suldaanka ayaa wali u ah haweenka aan ehelka lahayn, mad-habuhu waxay qabaan marka laga reebo mad-habta xanafiyada inuu nikaaxu baadil noqonayo haddii aan gabadha weligeeda la weydiisan.

Haddaba waxaa waajib ah nikaaxaha qarsoodiga ku dhacay oo aan laga idan qaadan ehelkeedii in mar labaad la cusboonaysiiyo iyadoo gabadha aabbaheed laga doonayo haddii uu nool yahay ama qof uu wakiishay haddii la waayana kuwa ugu dhow ayaa la weydiisanayaa, haddii la waayana wakiilkiisa, haddii midna la waayana suldaanka magaaladaas ayaa laga doonayaa ama naa'ibkiisa isaga ayaana meherinaya.

- **Naag nin kale u doonan mala dooni karaa**

Su'aasha 14aad: Ma bannaan tahay nin inuu doono naag nin kale u doonan?

Jawaab: Waxay isku raaceen afarta imaam inaysan bannaanayn in haweeney nin u doonan laga dul doono. Imaamka Bukhaari kitaabkiisa waxaa ku qoran inuu Nabigu yiri:

(Ninna uma bannaana inuu doono naag nin kale u doonan, iyo inuu ka dul baayaco badeecad uu nin kale baayacay (oo la isku af gartay).)

Waxay culimadu ka doodeen haddii ay dhacdo oo nin ka duldoono haweeney uu doonay nin kale oo uu guursado, in guurkaasi ansaxayo iyo in kale, Maalik iyo Axmed (labadiisa qawl mid ka mid ah) waxay yiraahdeen guurkaasi ma ansaxayo.

Abii Xaniifa iyo Shaafici iyo Axmed qawl kale oo laga wariyey waxay qabaan inuu ansaxayo guurkaasi, waxayna yiraahdeen waxa xaaraanta ah waa doonitaanka.

Culimada oranaysa ma ansaxayo guurkaasi waxay iyagu qabaan nikaaxaas inuu soo galayo xaaraantinimayntii hore, hase yeeshee iskuma ay khilaafin in ninkaasi uu dambaabey oo ku caasiyey Alle iyo Rasuulkiisa, in kasta oo qaarkood ka doodeen arrintaas, haddana qofku haddii uu dambi uu og yahay ku kaco waxay dhaawacaysaa diintiisa iyo caddaaladdiisa iyo mas'uuliyaddii uu Muslimiinta u qaban lahaa.

- **Guurka nin Ahlu-Kitaab ah gabar Muslimad ah**

Su'aasha 15aad: Maxay diinta Islaamku ka qabtaa nin Kiristaan ah oo guursaday gabar Muslimad ah? Haddii ay carruur u dhasho muxuu xukunkoodu noqonayaa?

Jawaab: Guurka nin Kiristaan ah uu guursaday gabar Muslimad ah waa baadil, Allaah wuxuu yiri:

(Isuma xalaal aha.)

Haddii uu guursado guurkaasi wuxuu noqonayaa baadil, carruurta ay u dhashana wacallo ayay noqonayaan nasabna kuma raacayaan ninka, waxaana loogu abtirinayaa hooyadood, laakiin haddii markii ay is guursanayeen jaahil ka ahaayeen xukunka sharciga ee guurkaas, xaaladda jaahiliintu waa

si kale oo nikaaxaasi waa baadil ilmahase waxaa loogu abtirinayaa aabbahood iyadoo loogu cudurdaarayo jahliga, macnaha haddii labadooduba ay jaahiliin ahaayeen nikaaxu wuxuu noqonaya baadil ilmahana aabbahood ayaa loo aqoonsanayaa oo loogu abtirinayaa iyadoo loogu cudurdaarayo jahliga iyo galmoodkaas shubhadu soo gashay, haddii ay ogaayeen xukunka Islaamka ee guurkooda laakiin ay iska fududaysteen oo xukunka Allaah ku tunteen iyagoo og, markaas caruurta ay isu dhalaan waxay noqonayaan wacallo, ninkana loogu abtirin maayo oo waxaa loogu abtirinayaa hooyadood oo kaliya, waana la edbinayaa ninkaas iyadoo lagu oogayo xadka sharciga ah galmoodka uu u galmooday Muslimad si xaq darro ah, sidaas ayaana waajib ah markii dawladda Islaamka ahi ay awooddo, markaas kaddib haddii Allaah soo hanuuniyo oo islaamo wuxuu ku guursanayaa nikaax cusub.

- **Nin la waayey oo xaaskiisii la guursaday kaddibna so noqday**

Su'aasha 16aad: Nin ayaa xaaskiisa ka maqnaa muddo dheer ilaa laga quustay oo loo maleeyey inuusan dib u soo noqonayn, xaaskiisii nin kale ayay guursatay waxayna u dhashay wiil, sannado kaddib waxaa soo noqday ninkeedii hore, haddaba guurkeeda ninka dambe sidiisii miyuu ku soconayaa mise wuu fasakhmayaa, ninkii hore ma u bannaan tahay inuu xaaskiisa soo ceshado haddii ay u bannaan tahay nikaax cusub miyuu samaynayaa?

Jawaab: Mas'aladaan waxaa laga cabbir qaadanayaa haweenta ninkeeda la waayey, oo haddii ninka la waayo oo ay dhammaato muddadii la raadinayey kaddibna la xugmiyo inuu dhintay haweentiisuna ay asay qaaddo oo ciddadii dhammaysato nin kalena guursato, markaas haddii uu yimaado ninkii hore ee la waayey waxaa la kala dooransiinayaa in guurka xaaskiisa la guursaday sidiisa loo daayo iyo in xaaskiisa loo soo celiyo, haddii guurka labaad ee haweentaas la guursaday sidiisa loo daayo arrintu waa caddahay oo markii horeba waxaa lagu nikaaxiyey si sharciga waafaqsan, haddii uu arrintaas ku raali noqon waayo oo doonayo in xaaskiisa loo soo celiyo (xaq ayuu u leeyahay) waana loo soo celinayaa xaaskiisa laakiin uma galmoon karo ilaa ay ka dhammaysanayso ciddada guurka labaad, umana baahna in meher labaad lagu celiyo marka loo soo celinayo ninkeedii hore sababtoo ah ma jiraan nikaaxiisii hore wax buriyey oo ku khasbaya inuu nikaax cusub sameeyo.

Wiilka ay u dhashay ninka labaad waa ilmo xalaal ah oo si sharciga waafaqsan iyo nikaax xalaal ah ku dhashay waxaana loogu abtirinayaa aabbihiis.

WADA DHAQANKA LABADA ISQABA

- **Eegmada cawrada labada is qaba**

Su'aasha 1aad: Ma bannaan tahay in haweentu eegto jirka ninkeeda dhammaantiis, iyo in isagu eego jirkeeda oo dhan iyagoo ku raaxaysanaya waxa Allaah u xalaaleeyey?

Jawaab: Way u bannaan tahay haweentu inay eegto jirka ninkeeda dhammaantiis, isaguna sidoo kale wuu eegi karaa jirkeeda oo dhan oo aan waxba laga soo reebin, waxaana u daliila qawlka Allaah ee ah:

(Kuwa ka ilaaliya xubintooda (taranka) sino. Waxa ka soo haray xaaskooda ama ay hanteen (addoonta), taasna lagu haaraami mayo. Ruuxii doona wax intaas dhaafsiisan waa mid xad gudbay.)

- **Xaaska oo laga maqnaado muddo dheer**

Su'aasha 2aad: Muxuu yahay xukunka ninka xaaskiisa ka maqnaanaya muddo sanad iyo ka badan ah isagoo ninku ku mashquulsan yahay shaqo iyo siduu reerka biil ugu soo saari lahaa, waxaana jira rag iyagu aan sidaas ahayn oo ku maqan siday saro dhaadheer u dhisi lahaayeen oo ay basas waaweyn iyo wax la mid ah ee dhaldhalaalka aduunka ah u tabci lahaayeen, shakina kuma jiro in ay halis tahay kala maqnaantaas badani inay keento sinaysi iyo foolxumo?

Jawaab: Haddii ninka iyo xaaskiisu ay isaga raalli yihiin kala maqnaanta waqtigu ha dheeraado ama ha gaabnaadee oo ay isugu dul qaadanayaan iyagoo is ilaalinaya dhibaato malahan, haddiise uu midkood naftiisa u cabsado inta la kala maqan yahay iyadoo irsaaqadda dalabkeedu uu daruuri yahay waa inuu kan kale weydiisto xaqa uu u leeyayay kulankooda, oo hadba sidii suurta gal ah oo loo kulmi karo lagu dadaalo si sharafta iyo dhowrsanaanta loo sugo, haddii uu sidaas diido waa inuu kan dacwada qabaa qaaddiga u tago si uu ugu kala saaro si sharciga waafaqsan, khasabna ma ahan ninka iyo xaaskiisu haddii ay muddo kala maqnaadaan inay sinaysanayaan muddaduba ha dheeraatee.

- **Haweenka la isla qabo**

Su'aasha 3aad: Nin xaas leh ayaa mid kale guursaday waxayna ka dalbatay haweeneydii hore in la siiyo dahabka haweenta cusub la siiyey oo kale, haddaba ninkaas waajib miyay ku tahay inuu sidaas falo?

Jawaab: Waajib kuma ahan haweentaas inuu siiyo waxa uu siiyey tan cusub oo kale, haddii isagu garto inuu siiyo way wanaagsan tahay, gaar ahaan haddii ay maslaxadi ku jirto oo uu ku raali gelinayo, si uu u hagaago wada dhaqankooda dambe.

Su'aasha 4aad: Nin xaas leh ayaa safray wuxuuna tagey waddan kale isagoo ku nagaaday ilaa uu ka guursaday haweeney kale, wuxuu xaaskiisa cusub la joogay muddo bilo ah, kaddibna wuxuu u soo noqday xaskiisii hore, haddaba miyuu u gudayaa xaaskiisii hore bilihii uu ka maqnaa, mise si caadiya ayuu ugu kaltamayaa?

Jawaab: Nin xaas leh haddii uu xaas kale guursado waxaa sunno ah inuu la joogayo saddex cisho haddii ay garoob tahay, haddii ay inan tahayna toddobaad uu la joogo, markaas kaddib si caddaalad ah ayuu ugu kaltamayaa oo midba habeenkeeda la joogayaa, haddii uu middood ku maqnaado waqti dheeraad ah wuu u qallaynayaa tii kale inta uu taas ku maqnaa oo kale, haddii ay suurta gal tahay inay iyadu u saamaxdo mooyaane.

- **Haddii ay haweentu ninkeeda u hibayso maalkeeda?**

Su'aasha 5aad: Haweeney ayaa ninkeeda siisay maalkeedii aabbaheedna ma noola, haddaba ma u bannaan tahay walaalaheed inay ka hor istaagaan arrintaas?

Jawaab: Uma bannaana walaalaheed inay is hor taagaan arrintaas, haddii caqligeedu taam yahay oo ay maalkeeda sadaqaysan karto, hibayntaas ay maalkeeda hibaysayna way ansaxaysaa haddii walaalaheed ka raali yihiin iyo haddii kaleba.

- **Bixidda ay haween gurigooda ka baxaan iyaga oo ninka ka idan qaadan**

Su'aasha 6aad: Haddii ay haweentu suuq gurigeeda u dhow aaddo ninkeeda oo aan ogayn iyadoo doonaysa inay soo iibiso waxyaalo iyada iyo caruurteedu u baahan yihiin, miyay arrintaas ku dambaabaysaa?

Jawaab: Waxaa habboon haweentu ninkeeda in ay ka dalbato inuu u idmo bixitaanka markii uu maqan yahay haddii ay u baahato wax daruuri ah, si markii ay wax u baahato ay u baxdo iyadoo anshax iyo asluubi ka muuqato oo ku xijaaban dhar aan qurxoonayn, indhahana laabaysa, wax kasta oo tuhun iyo fitno u keenayana ka dheeraanaysa isla markaasna xijaaban oo aan is udgin, marka ay danteeda soo bogato waa inay dhakhse u soo noqoto, arrintaasna dambi uga imaan mayo haddii Alle idmo.

FURNIINKA

- **Nin xaaskiisii furay isagoo xanaaqsan**

Su'aasha 1aad: Nin ayaa isagoo aad u xanaaqsan lagu yiri, "Xaaskaagii miyaad furtay?" Wuxuu ku jawaabay, "Haa, waan furay," isagoo ku cariiqsanaya kaddibna maalintii labaad ayuu inta shaydaanka iska naaray oo markhaatiyaal soo kaxaystay haweentiisii soo ceshaday, wuxuuna doonayaa inuu ogaado xukunka arrintaas?

Jawaab: Xaaskaagu way kaa furantay markii ay ku weydiiyeen in aad xaaskaaga furtay oo aad ugu jawaabtay, "Haa!" Soo celinta aad soo celinaysayna way ansaxaysaa haddii markii aad furaysey aadan ku furin dalqaddii ugu dambeysey, haddiise aad ku furtay dalqaddii ugu dambeysey kuuma bannaana in aad soo ceshatid ilaa uu nin kale guursado isagoon uga dan lahayn inuu kuu xalaaleeyo, haddii ay ninkaas kala tagaan, guur cusub iyo meher cusub ayaad ku guursan kartaa, haddii ay ka raalli tahay.

- **Xukunka haweentu inay dalbato furniin**

Su'aasha 2aad: Haweeney ayaa waxay leedahay ninkaygu waa jaahil xuquuqda aan ku leeyahayna ma daryeelo aniga iyo waalidkay ayuu lacnadaa wuxuu igu yiraahdaa Yuhuudiyad iyo Masiixiyad iyo wixi la mid ah, aniguna waan iska sabri jirey maadaama aan awlaad u leeyahay, hase yeeshee kaddib markii ay rumatiisimo igu dhacday ayaan aragtidiisii wax kasta ka necbaystay ilaa aan gaaray heer aanan awoodin in aan la hadlo nacayb dartiis, waxaan xaaladdaas ku sugnaa muddo lix sano ah oo aan ka ahaa agtiisa haweeney la furay ama ajnabiya, waxaan ka dalbaday furniin wuuna diiday, haddaba maxay diintu ka qabtaa dalabkayga aan furniinka dalbanayo?

Jawaab: Haddii ay arrintu tahay sida aad sheegtay wax dhib ah ma leh in aad furniin ka dalbato, haddii aad doontidna waxaad kula gorgortami kartaa in aad maal siinaysid hadduu ku furo, si aad dhibkiisa iyo dabci xumadiisa uga nasatid, haddiise aad aragto in aad u sabri karto adigoo ugu naseexaynaya asluub wanaagsan, Rabbina hanuun u weydiinaya adigoo caruurtaada u danaynaya oo fiirinaya baahida aad u qabtaan biilkiisa, waxaan kuu rajaynayaa in aad arrintaas ajar badan ku helaysid, waana haddii uu ninkaasi yahay nin tukada oo aan diinta caayin, Allaah waxaan u weydiineynaa hanuun iyo toosnaan, haddiise aanu tukan diintana caayo ,kuuma bannaana in aad la

sii joogto, jirkaagana aad u oggolaatid sababtoo ah diinta oo la caayo ama lagu jeesjeeso waa gaalnimo diinta looga baxayo sida ay qabaan ijmaaca culimadu, Allaah wuxuu yiri:

“Ma waxaad ku jeesjeesayseen Allaah iyo aayadihiisa iyo Rasuulkiisa? Ha cudurdaaranina waxaa xaqiiq ah in aad gaalowdeen rumayntiinii kaddib.”

Sidoo kale salaadda ka tagiddeedu waa gaalnimo weyn, sida ugu saxsan culimada qowlkooda xataa haddii aanu qofku inkirin waajibnimadeeda waxaana arrintaas sugaya xadiis ku yaal Saxiixa Muslim oo uu Jaabir ka warinayo Rasuulku inuu yiri:

“Qofka iyo gaalnimada iyo shirkiga waxaa u dhexeeya salaadda ka tegiddeeda.”

Imaamu Axmed iyo Ahlu-Sunanku waxay sanad saxiix ah kaga wariyeen Burayda bin Xusayib inuu Nabigu yiri,

“Annaga iyo gaalada waxaa noo dhexeeya salaadda qofkii ka tagaana waa gaaloobay.”

Aayadaha iyo axaadiista arrintaan caddaynaysa way badan yihiin.

- **Furniinka saddexda dalqadood oo hal mar ah**

Su’aasha 3aad: Haddii ninku haweentiisa ku furo saddex dalqadood oo hal mar ah (macnaha uu yiraahdo saddex baad iiga furan tahay) muxuu noqonayaa arrintaas xukunkeedu?

Jawaab: Haddii uu ninku haweentiisa ku furo saddex dalqadood oo hal mar ah (macnaha uu yiraahdo saddex baad iiga furan tahay), jamhuurka ahlu cilmigu waxay qabaan inay haweentaasi ku furmayso saddexdii dalqadood, ninkana ay sidaas kaga xaaraantinimoobayso, ilaa uu ka guursado nin kale isagoon guurkaas ula jeedin inuu naagtaas u xalaaleeyo ninkii horay u furay, guurkaasuna waa inuu noqdo mid ay ninka iyo naagtu ku kulmeen oo galmood ka dhex dhacay, kaddibna ay ku kala tagaan furniin ama geeri, waxayna u soo daliilsadeen arrintaas in Cumar bin Khaddaab uu arrintaas xukmiyey, qaar kale oo ahlu cilmiga ka mid ah waxay qabaan, in furniinkaas laga soo qaadayo hal dalqad ninkuna uu xaq u leeyahay inuu xaaskiisa soo ceshado inta ay ciddada ku jirto, haddii ay ciddada ka baxdana waxay ugu xalaal noqonaysaa inuu nikaax cusub ku soo ceshado, waxayna arrintaas u soo daliilsadeen Muslim inuu Saxiixiisa ku wariyey xadiis uu ka warinayo Ibnu Cabbaas oo oranaya:

“Waagii Nabiga iyo waagii Abuu Bakar iyo labo sano oo ka mid ah waagii Cumar furniinka saddexda dalqadood ah hal ayaa laga soo qaadi jiray, kaddibna Cumar ayaa wuxuu yiri, ‘Dadku arrin ay ka dhowrsan jireen bay ku degdegeen,’ (macnaha inay haweenka ku furaan saddex dalqadood oo hal mar ah), ‘Ee ka warrama haddii aan ku socodsiinno?’ Wuuna kaga dhabeeyey oo wuxuu ku soo rogey ninkii saddex dalqadood hal mar ku fura xaaskiisa, inay saddexdii dalqadoodba ku furmayso.”

Wuxuu kaloo Muslim wariyey in Abuu Sahbaa uu ku yiri Ibnu Cabaas “Xilligii Nabiga iyo xilligii Abuu Bakar iyo saddex sano oo xukunkii Cumar ah, saddexda dalqadood oo hal mar xaaska lagu furo soo lagama soo qaadi jirin hal dalqad?”

Wuxuuna ugu jawaabay, “Haa.”

Waxay kaloo soo daliilsadeen Imaamu Axmed oo Musnadkiisa Ibnu Cabbaas kaga wariyey sanad wanaagsan, in Abaa Rukaana uu ku furay xaaskiisii saddex dalqadood, (arrintiina ay ku cuslaatay) oo aad uga murugooday, markaasna Nabigu uu ku yiri:

()

Waxaa laga soo qaadayaa furniinkaas hal dalqad, xaaskiisiina wuu u soo celiyey, furniinkaas labada xadiis ku xusan waxay ku fasireen saddex dalqadood oo hal mar ah, waxayna is waafajiyeen, labadaan xadiis iyo aayadda uu Alle yiri:

“Haddii uu furo uma bannaana markaas kaddib ilaa ay nin kale guursato.”

Sidaas ayay doorteen koox ahlu cilmiga ka mid ah sida Ibnu Cabbaas warinta saxiixa ah ee laga wariyey, in badan oo ahlu cilmiga ka mid ah waxay qaateen warin kale oo Ibnu Cabbaas ka sugnaatay, ahlu cilmiga qaba in furniinkaas laga soo qaadayo hal dalqad waxaa ka mid ah Cali bin Abuu Daalib, Cabdirraxmaan Bin Cawf iyo Zubayr ibnu Cawaam, waxaa kaloo sidaas qaba koox ka mid ah taabiciintii iyo Imaam Maxamed bin Isxaaq (ee siirada wax ka qoray) waana sida uu doortay Sheekhul-Islaam Ibnu Taymiya iyo ardaygiisii Al-Callaama Ibnu Qayim, Aniguna sidaas ayaan ku raacsanahay oo ku jawaabayaa sababtoo ah waxay waafaqsan tahay ku dhaqan lagu dhaqmayo daliilka sharciga ah dhammaantiis, waxaa kaloo ku sugan turid iyo naxariis Muslimiinta loo naxariisanayo.

- **U wakiilashada furniinka haweenta nafteeda ama cid kale**

Su’aasha 4aad: Waxay shareeecada Islaamku sugtay furniinku inuu yahay xaq uu leeyahay ninku, haddana culimada qaar ka mid ah ayaa waxay qabaan inuu ninku xaaskiisa u wakiilan karo furniinkeeda ama uu nin kale u wakiisho furniinka xaaskiisa, maxaa xukunkeedu yahay arrintaas?

Jawaab: Ma garanayo wax xadiis ah oo uu Nabigu kaga hadlay in furniinka loo wakiisho haweeney ama cid kaleba, culimadu arrintaas waxay kala soo dhex baxeen Kitaabka iyo Sunnada oo ay ku bayaansan tahay inuu ninka caqligiisu dhammaystiran yahay maalkiisa iyo wixi la mid ah u wakiilan karo cid kale, furniinka taas oo kale ayay ka soo qaadeen, sideedana furniinku waa xaq uu ninku leeyahay oo haddii uu xaaskiisa furniinkeeda u wakiisho iyada nafteeda ama cid kale oo mas’uuliyaddaas qaadi karta dhibaato kuma sugna, annaga oo tix raacayna qaacidadii sharciga ahayd ee aan soo xusnay.

Haseyeeshee ma bannaana inuu ninku cid kale u wakiisho furniin saddex dalqadood ah, sababtoo ah isagaba uma bannaana sharci ahaan inuu xaaskiisa saddex ku furo mar kaliya.

Imaam an-Nasaa’i wuxuu wariyey xadiis sanadkiisu xooggan yahay oo laga wariyey Maxamuud bin Lubayd oo yiri, “Nabiga ayaa loo sheegay nin xaaskiisii ku furay saddex dalqadood oo isku mar ah, markaas ayuu Rasuulku inta xanaaqay wuxuu yiri,

“Kitaabka Allaah miyaa lagu dheelayaa anigoo idin dhex jooga?” Labada Saxiixna waxaa ku qoran ibnu Cumar mar wax laga weydiiyey furniinkaas inuu ku jawaabey,

“Haddii aad saddex dalqadood ku furtay, waxaad caasiday Rabbigaa siduu ku amray in aad xaaskaaga u furtid.”

- **Furniinka haween uur leh**

Su’aasha 5aad: Mala furi karaa haweeney xaamilo ah?

Jawaab: Dhib kuma sugna furniinka haweeney xaamilo ah Nabiguna wuxuu ku yiri Ibnu Cumar markii uu xaaskiisa furay iyadoo macduur ah:

“Soo cesho oo hayso ilaa ay ka daahir noqoto oo haddana caado hesho ay ka daahir noqoto, markaas kaddibna haddii aad doontid iska fur iyadoo daahir ah inta aadan taaban ama iyadoo uur leh.”

- **Furniinka iyo xaaladaha shabbaha**

Su’aasha 6aad: Muxuu yahay khulciga ku xusan Kitaabka Qur’aanka ah iyo Sunnaha?

Jawaab: Isfurashada Qur’aanka iyo Sunnada ku xusan waa inay haweentu ninkeeda dhibsato oo ay doonayso inuu furo ayna siiso meherkii ay ka qaadatay ama qaarkiis si ay nafteeda ugu furato oo uu isaga furo, haddiise labadoodu ay is rabaan ma bannaana in la kala furo waana arrin cusub oo Islaamka aan horay ugu jirin.

Haddii aysan ninkaas rabin oo doonayso inuu furo waxay isku furanaysaa oo u celinaysaa meherkii ay ka qaadatay wuuna furayaa sida ku sugan Kitaabka iyo Sunnada culimaduna ay isku waafaqeen.

- **Furniinku ma dhacayaa haddii ninka la khasbo**

Su’aasha 7aad: Haweeney ayaa ninkeedii karaahsatay waxayna ka dalbatay in uu furo (khulco) waxay ku tiri, “Haddii aadan i furin waan is dilayaa.” Waxaa ninkii lagu khasbay inuu furo, nin kale ayayna guursatay, ninkii hore wuxuu doonayaa in loo soo celiyo xaaskiisii wuxuuna ku andacoonayaa in khasab looga furay markii hore, iyaduna waxay rabtaa ninka labaad ee guursaday?

Jawaab: Haddii ninkaasi uu ka gaabiyo haweenta xaqeeda ay waajibka ugu leedahay ama uu dhib u geysto ha ahaado dhibkaasi hadal xumo ama gacan-qaad isagoo ka gardarran sidaas awgeedna lagu khasbay inuu furo, furniinkaasi waa ansaxayaa guurkeeda labaadna kuma ay khaldana waxayna u tahay xaas ninka labaad ee guursaday.

Haddiise ninka la garaaco ama la xiro oo lagu khasbo inuu xaaskiisa furo, isaga oo xaqeeda gudanaya oo si wanaagsan ula dhaqmaya furniinkaasi ma dhacayo.

Haddii haweentu ay kahanayso ninka isagoon wax dulmiya ku samayn waxa laga codsanayaa inuu furo iyadoon la khasbayn, haddii uu diidana waxaa haweeneyda la farayaa inay sabirto (oo ninkeeda raaliyo u noqoto) maadaama aanu la imaan wax dulmiya oo looga fasakho.

- **Muxuu yahay macnaha hooyaday ayaad iga tahay?**

Su’aasha 8aad: Nin ayaa xaaskiisa ku yiri, “Hooyaday iyo walaashay ayaad iga tahay.” Muxuu noqonayaa xukunkoodu?

Jawaab: Haddii uu uga dan leeyahay cisaynta iyo karaamaynta hooyada iyo walaasha oo kale ayaan ku cisaynayaa wax dhib ah ma leh, haddiise uu ula jeedo hooyaday iyo walaashay oo kale baad iga tahay guur (geyaan) ahaan, markaas waa dihaar waxaana ku waajiba wixii ku waajibayey ninka dihaarka ku dhawaaqa oo ku yiraahda xaaskiisa hooyaday ama walaashay baad iga tahay, haddii uu haweentaas inuu haysto doonayo uma dhawaanayo ilaa uu kafaare gudkii dihaarka la yimaado.

Dihaarku waa kafaara gudka ku waajiba haddii ninku naagtiisa yiraahdo “Hooyaday baad iga tahay,” iyo wixi la mid ah. Kafaaro gudkaasi waa in uu xoreeyo mu’min addoon ah haddii uu waayana wuxuu soomayaa laba bilood oo xiriir ah oo aanu maalin ka afurin, haddii uu kari waayana wuxuu

quudinayaa 60 maskiin isagoo mid kasta siinaya saac barkiis oo timir ama bariis iyo wixi la mid ah, halkii saac wuxuu u dhigmaa qiyaas ahaan kiilo iyo bar.

- **Ma dhacayo furniinka nin sakhraansan**

Su'aasha 9aad: Nin sakhraansan oo caqligiisii maqan yahay haddii uu ku dhaarto inuu xaaskiisa furay ma ansaxayaa furniinkaasi?

Jawaab: Mas'aladaan laba qawl ayay culimadu ka qabaan: kan saxiixa ahna waa inuusan furniinkaasi ansaxayn dhaartiisuna ka soo qaad lahayn, maadaama uu sakhraan yahay.

Sidaas waxaa laga wariyey Cusmaan bin Cafaan saxaabaduna kuma ay khilaafin, intaan ogahay, waana qawlka in badan oo salafka iyo culimadii dambe ka mid ah, sida Cumar bin Cabdulcasiis iyo qayrkiisba, waxaana waafaqsan qawlka qadiimka ee Imaamu Shaafici koox asxaabtiisa ka midi ahna ay doorteen iyo qawlka kale oo laga wariyey Imaamu Axmed koox asxaabtiisa ka mid ahna ay doorteen, waxaa sidoo kale qaba koox ka mid ah asxaabta Abuu Xaniifa oo uu ka mid yahay Daxaawi, madaahib kale ayaa iyaguna sidaas qaba waana sida raajixa ah,

Bukhaari waxaa kitaabkiisa ku qoran in Maacis bin Maalik markii uu Nabiga u yimid oo uu qirtay inuu sinaystay Nabigu amray in la soo baaro inuu sakhraan yahay iyo in kale. Haddii uu sakhraan yahay qirashadiisu ma ansaxayso haddii la aqbali waayey wixii uu qirtayna waxaa la ogaanayaa in aan qawlkiisu qabasho lahayn, sida ruuxa waalan oo kale, qofka sakhraansan in kastoo uu caasi yahay haddana ma uu oga waxa uu ku hadlayo, haddii aanu ogayn waxa uu ku hadlayana ula jeeddo ma lahan hadalkiisu, wax kasta oo la qabanayana waa inay niyadda ka soo fulaan, waxaa taas la mid ah haddii uu cuno shay xaaraan ah oo uu ku waasho, waalidaasi iyadoo ku timid dambi uu sameeyey haddana furniinkiisu ma dhacayo hadalkiisuna qabad ma leh.

Qofkii si dhug leh shareecada ugu kuur gala wuxuu ogaanayaa in qawlkaani saxiix yahay dadka oranaya waxbuu furi karaana qawlkoodu daliil iyo xujo ma haysto, sida saxiixa ahna furniinkaasi ma dhacayo, in uu waxa uu ku hadlayo garanayo mooyaane, sida aysan salaaddiisu u ansaxayn furniinkiisuna ma ansaxayo. Allena wuxuu yiri:

"Kuwa (xaqa) rumeeyow salaadda ha tukanina adinkoo sakhraansan ilaa aad ka garanaysaan waxa aad ku hadlaysaan."

- **Haddii ninku u ballan qaado xaaskiisa inuu furayo, maka furmaysaa?**

Su'aasha 10aad: Haddii nin xaaskiisa ku yiraahdo kuma doonayee orod oo reerkiinii aad waana ku furi doonaa, oo uu hadalkaas furniin u niyaysto ma u bannaan tahay inuu soo ceshado oo uu meher labaad bixiyo?

Jawaab: Furniinku ballan qaad kuma dhaco, xataa haddii hadalkaasi soo noq noqdo waajibna ma ahan inuu ballantaas oofiyo hadiise uu furay intuusan oran reerkiina aad, hadalkaasna uu furniin ula jeeday ee arrintu aysan ahayn waan ku furi doonaa oo kaliya, waxay uga furmaysaa hal dalqad, haddii markii hore dalqad ka badan aanu niyaysan, wuuna soo ceshan karaa iyadoo ciddada ku jirta, shardina ma ahan inay ka raali tahay soo celinta walina looma baahna, meher cusubna ma bixinayo.

- **Ninku ma furayaa xaaskiisa haddii hooyadiis sidaas ka dalbato?**

Su'aasha 11aad: Nin xaas iyo carruur leh ayaa hooyadiis karaahsatay xaaskiisa waxayna u soo ban dhigtay inuu xaaskiisa furo, haddaba ma u bannaan tahay inuu furo?

Jawaab: Uma bannaana inuu u furo hadalka hooyadiis, waana ku waajib in uu hooyadiis baarri u noqdo, furniinka xaaskiisuna hooyo baarrinimadeed ma ahan.

ASAYDA

- **Haweenta asayda sidda way qubaysan kartaa**

Su'aasha 1aad: Maxaa ku waajib ah naagta uu ninkeedii geeriyooday, maxaa xaaraan ah, maxaase u bannaan?

Jawaab: Haweeneyda laga dhintay waxaa ku waajib ah arimaha soo socda:

• Inay gurigeeda ku negaato oo aanay ka bixin inay dan soo gudanayso mooyaane ama ay u baxdo wax daruuriya sida inay isbitaal tegayso haddii ay xanuunsato, ama ay suuqa cunto iyo wax la mid ah ka soo iibsanayso, haddii aysan haysan cid u qabata hawshaas.

• In aysan ku labbisan dhar qurxoon, oo ay ku labisato dharka kale.

• In ay ka fogaato dhammaan waxyaalaha la isku carfiyo oo dhan, laakiin markii ay dhiigga caadada ka mayrato dhib ma Ieh in ay uunsi hoosta gashato oo isku carfiso.

• In ay ka fogaato dhegaha iyo jinjimaha iyo waxyaalaha kale ee haweenku ay xidhaan oo isku qurxiyaan, ha ahaadeen dahab, qalin, dheeman iyo wixi la mid ah.

• In ay ka fogaato indha kuulashada.

Rasuulku wuu ka reebay haweenta laga dhintay arimahaas oo dhan, wayna u bannaan tahay inay dadka ehelkeeda ah iyo haweenka kaleba la fariisato oo la sheekaysato, way la fariisan kartaa dadka maxramka u ah cunto iyo shaah iyo wixi la mid ah way u keeni kartaa, sidoo kale guriga gudihiisa, deydkiisa qaybtiisa kore dhammaan way ka shaqaysan kartaa oo tegi kartaa, hawshii guriga oo dhan way qaban kartaa, haddii ay noqoto cunto karin, dhar tolid, guri xaaqid, dhar dhiqid, xoolo lisid iyo hawsha hablaha caadiga ee la midka ah qabtaan oo dhan, dayaxa way arki kartaa sida haweenka kale u arkaan oo kale, hagoogta madaxa way iska qaadi kartaa markaan rag ajaanib ka ah aysan la joogin.

- **Haweenta da'da weyn asay way qaadaysaa**

Su'aasha 2aad: Haddii uu nin ka dhinto haweeney da' weyn oo cimrigeedu 70 sano kor u dhaafay, garashadeeduna xumaatay wax adeeg ahna ninka aan u qaban jirin, waajib miyay ku noqonaysaa inay asay qaaddo? Sidaan og nahay haweenka uurka leh ciddadoodu waa inta ay ka dhalayaan kaliya, markaas haddii ujeedada laga leeyahay asaydu ay tahay, in la hubsado haweentu inaysan uur lahayn, haweenta da'da weyni dhalmadii horay ayayba u daysey?

Jawaab: Haweentaasi waxay la mid tahay haweenka kale waxayna ciddo tirsanaysaa afar bilood iyo toban cisho, sida ay haweenka kaleba yeelaan, Allaahna wuxuu yiri:

"Raggga idinka mid ah ee la oofsaday kana tagey haween, waxay haweenkaasi ciddo tirsanayaan afar bilood iyo toban cisho."

Xikmadda ku jirta in haweenta uurka leh ciddadeedu ay ku xiran tahay dhalmadeeda waxaa ka mid ah, uurka oo ah xaq uu ninka hore leeyahay, markuu ninku geeriyoodo ama furo iyadoo uur leh, haddii ay haweentu guursato nin kale wuxuu ninka labaad ku waraabinayaa manidiisii ilmaha uurka ku jira, arintaasna waa xaaraan Nabiguna wuxuu yiri:

Qofka Muslimka ah waxaa ku waajiba inuu ku dhaqmo shareecada, xigmadda ku jirta ha garto ama yaanu garan, isagoo rumaysan Allaah inuu yahay mid xikmad badan, wax kasta oo uu jideeyey ama qadarayna ay xigmadi ku jirto, qofkii Alle u fududeeyo inuu fahmo xigmadda ku jirta waa kayr.

- **Isma udgin karto haweentu inta ay asayda siddo guurna looma ban dhigi karo si sarbeeb ah mooyaane**

Su'aasha 3aad: Ma bannaan tahay haweenta asayda sidda inay carruurteeda cadar u mariso? Guur ahaanse ma loo dooni karaa iyadoon wali ciddadii ka bixin?

Jawaab: Uma bannaana haweenka asayda wada inay is udgiyaan, dhibse malahan haddii ay cadarka carruurteeda ama marti u timid u mariso iyadoon la wadaagayn, mana bannaana inta ay assayda siddo in si cad guur loogu soo ban dhigo, si sarbeeb ahse wax waa loo dareensiin karaa, Allaahna wuxuu yiri:

"Dhib (dambi) korkiina ma aha waxaad sarbeebtaan oo hadal haween ah (doonid)."

Allaah wuxuu banneeyay in sarbeeb guur loo dareensiiyo, mana uu bannayn in si cad guur loogu soo bandhigo, arintaasna Alle xigmad qoto dheer ayuu ka leeyahay.

- **Saabuunta udgoon iyo asayda**

Su'aasha 4aad: Waxaan ahay haweeney ninkeedii geeriyooday muddo dhow, waxaan ku jiraa waqtigii asayda, ma ii bannaan tahay in aan ku qubaysto, ama ilmahayga ugu qubeeyo saabuun udgoon leh?

Jawaab: Asaydu waa inay haweentu ka fogaato wax kasta oo soo jiidanaya ragga iyo la kulankooda sida is udginta, indho-kuusha, iyo dahabka iyo waxyaalaha kale ee la xidho, waxyaalahaas la isku qurxiyo waa isku mid haddii ay ku xirato surka ama dhegaha ama gacmaha, dharkuna waa sidoo kale oo waa ka xaaraan dhar kasta oo la isku qurxiyo, waxaana ku waajiba inay ku nagaato gurigii ay deganayd markii uu ninkeedu geeriyooday, Allaahna wuxuu yiri:

“Raggga idinka mid ah ee la oofsaday kana tagey haween, waxay haweenkaasi ciddo tirsanayaan afar bilood iyo toban cisho, markay gaaraan muddadooda wax dhib ah idinkama saarna waxay ku falaan naftooda si fiican, Eebbana waxaad falaysaan waa ogyahay).

Qawlka Allaah ee ah: () wuxuu tusinayaa in markaas ka hor ay ka xaaraan ahaayeen arimahaas oo dhami, sunnaduna sidaas ayay bayaanisay.

Markaas saabuunta udgoon uma bannaana haweenta asayda sidda, waxayse ku mayran kartaa saabuun aan lahayn caraf iyada ayaana kufilan.

NIDARKA

- **Nadarku waa karaahiyo oofintiisuna waa waajib**

Su’aasha 1aad: Maxay diintu ka qabtaa nidarka? Haddii aan la oofin nidarka ciqaab miyaa ka imanaya?

Jawaab: Nidarku waa karaahiyo sharci ahaan, waxaa Nabiga ka sugnaatay inuu reebay nidarka uuna yiri:

“Nidarku sidiisaba khayr ma keeno, ee ruuxa bakhaylka ah ayaa xoolaha looga soo saaraa.”

Dadka qaarkood haddii ay xanuunsadaan ama khasaaraan, ama dhib kale soo gaadho waxay nidraan sadaqo inay bixinayaan ama xoolo qalayaan haddii cudurka ay ka bogsadaan ama khasaarada ay ka badbaadaan, waxayna citiqaadsan yihiin Allaah inuusan caafimaad ama faa’iido siinayn inay nidar galaan mooyaane, sidaas awgeed ayuu Nabigu sheegay Allaah inuusan beddelayn wixii uu qaddaray oo uu xugmiyey, qofka bakhiilka ahna inuusan sadaqo bixin inuu nidar oofinayo mooyaane.

Nidarka waa la oofinayaa haddii uu yahay cibaado, sida salaad ama soon ama sadaqo ama ictikaaf, haddiise uu nidarku yahay wax Alle lagu caasinayo sida dil, sino, khamro cabid, dadka maalkiisa oo dulmi lagu qaato iyo wixi la mid ah ma bannaana in la oofiyo waxaana beddelkiisii la bixinayaa kafaare gudkii dhaarta oo ah quudin toban miskiin, ama waxyaalihii kale ee xadiisku xusay.

Haddii nidarku yahay waxyaalaha bannaan sida cunto, cabbitaan, dhar, safar, hadal caadi ah iyo wixi la mid ah waxaa la kala dooran siinayaa inuu oofiyo nidarkaas iyo inuu kafaare gudkii dhaarta bixiyo.

Haddii nidarku yahay cibaado sida sadaqo, cunto ama xoolo la qalayo waxaa la siinayaa masaakiinta iyo dadka tabarta daran, haddiise uu yahay cibaado xubnaha laga gudanayo ama maal la bixinayo, sida jihaad ama xaj iyo cumro in la oofiyo ayaa waajib ah.

Haddii maalka uu bixinayo uu ku nidray in wax loogu qaban doono meel gaar ah sida masaajid ama xafiis ama mashruue khayri ah uma bannaana inuu ku bixiyo meel kale.

- **Xukunka dib u dhigidda nidarka**

Su'aasha 2aad: Muxuu yahay xukunka in dib loo dhigo oofinta nidarka haddii uu qofku gaaro ujeeddadii uu wax u nidray, sida qof yiri, "Waxaan Allaah u nidray in aan soomo shan maalmood haddii aan caafimaado," kaddibna markii uu caafimaaday dib u dhac sameeyey oo aan soomin, in kastoo markii uu nidarka galayey aanu xaddidin waqtiga uu soonkiisu noqon doono, haddaba shanta maalmood ee uu nadray ma waxaa laga doonayaa inuu xiriiriiyo? Daahitaanka iyo dib u dhaca uu ka dib dhacay soonkaas kafaaro miyaa ku waajibaya haddii uu niyaysnaa inuu soomo oo aanu diidanayn soonku?

Jawaab: Waa waajib in la oofiyo nidarka la nidray wax Allaah loogu dhawaanayo sida soon, sadaqo, ictikaaf, xaj, Qur'aan akhris iyo wixi la mid ah.

Haddii nidarkiisu ku xirnaa shardi sida inuu Allaah caafimaad siiyo ama inuu safar ka soo noqdo, haddii uu helo waxa uu doonayey waxaa ku waajiba inuu dedejiyo oofinta nidarka, haddii uu dib u dhac sameeyo kaddibna uu dib ka oofiyo nidarka wax dambi ah kuma leh dib u dhigidda, haddii uu dhinto isaga oo aan oofin waxaa nidarkaas ka oofinaya dadkii dhaxalkiisa lahaa, waxaase habboon inuu qofku dedejiyo oofinta nidarka si waajibkaasi uga dhaco.

- **In la bedelo wixii la nidray**

Su'aasha 3aad: Ma bannaan tahay in qofku beddelo wixii uu nidray haddii uu arko wixii uu nidray wax ka nafci badan?

Jawaab: Inta aanan su'aashan ka jawaabin waxaan oranayaa oraahdan, horta sideedaba ma habboona in wax la nidro sababtoo ah nidarku waa karaahiyo. ama waa xaaraan, Nabigu wuu reebay nidarka wuxuuna yiri: "Khayr ma keeno ee ruuxa bakhiilka ah ayaa xoolaha looga soo saaraa," khayrka aad u malaynaysid in nidarka aad gashay sabab u yahay, xaqiiqo ahaan wax saamayn ah kuma leh nidarku, in badan oo dadka ka mid ah haddii ay xanuunsadaan waxay nidraan in haddii Allaah caafimaad siiyo waxaas iyo waxaas bixin doonaan, haddii wax ka dhumaan sidaas oo kale ayay nidar galaan inay waxaas iyo waxaas bixinayaan haddii Allaah baadidaas u soo celiyo, haddaba markii uu caafimaado ama baadidii helo ma ahan in uu nidarka wax ku helay ee Allaah ayaa (fadligiisa) ku siiyey, Allaahna waa ka deeqsisan yahay in wixii la weydiisto uu shardi ku xiro, Allaah waa inuu weydiisto inuu caafimaad siiyo ama baadidii u soo celiyo, nidarkuna wax kaalin ah kuma lahan helitaankooda.

Dadka in badan oo ka mid ah markay helaan shaygii ay sababtiisa nidarka u galeen way ka caajisaan inay nidarka oofiyaan waxaana laga yaabaa inayba iska dhaafaan oo aanay oofin nidarkaas waana arrin aad halis u ah, bal maqal Allaah wuxuu ka yiri:

"Waxaa ka mid ah kuwo la ballamay Allaah hadduu wax ka siiyo fadligiis inuu sadaqaysto oo ka mid noqdo kuwa suubban. Markii uu wax ka siiyey fadligiisa ay ku bakhayleen jeedsadeenna iyagoo diidi. Wuxuu ku reebay quluubtooda munaafiqnimo tan iyo maalintay la kulmi ku baajintooda Allaah waxay kula ballantameen iyo beentoodii darteed."

Maadaama ay arrintu sidaas tahay qof Muslim ah uma habboona inuu nidar galo.

Haddii aan usoo noqono su'aashii nala weydiiyey jawaabteeda waxaan oranaynaa: Haddii qof nidar galo oo jiho gaar ah nidarkaas ula niyoodo kaddibna uu arko meeshii uu ula niyooday nidarkaas meel kale oo ka fadli badan kana ajar badan oo Allaah loogu sii dhawaanayo kana anfici og dadka,

xaaladdaas oo kale way u bannaan tahay inuu nidarkiisii beddelo oo ku bixiyo meesha ka fadliga badan meeshii markii hore uu u nidray, waxaana u daliil ah nin u yimid Nabiga oo ku yiri:

“Rasuulkii Allaahoow waxaan nidray haddii Allaah kuu furo oo aad qabsatid Makka in aan ku soo tukado Baytal Maqdis, markaas ayuu Nabigu ku yiri, “Ku tuko halkaan (Masjid al-Xaraam), ninkii ayaa mar kale su’aashii ku celiyey Nabiguna wuxuu ugu jawaabay, “Ku tuko halkaan,” ninkii ayaa mar kale su’aashii ku celiyey Nabiguna wuxuu ku yiri, “Marka sidii aad doontid yeel.”

Arrintaasi waxay daliil u tahay inay bannaan tahay in qofku waxa uu nidray beddeli karo haddii uu arko wax ka fadli badan wixii uu nidray.

KAFAARE GUDKA DHAARTA

- **Qaddarka cuntada la bixinayo kafaare gudka**

Su’aasha 1aad: Waxaan ognahay kafaare gudka dhaartu inay tahay quudin toban miskiin, haddaba cuntada halkii miskiin la siinayo waa intee? Cuntada la bixinayo waa noocee?

Jawaab: Kafaare gudka dhaartu waa in la quudiyo toban miskiin ama loo arratiro ama la xoreeyo addoon, qofkii aan intaas midna heli karin wuxuu soomayaa saddex maalmood oo isku xigta.

Cuntada la bixinayo waa cuntada qofka dhaartay isaga ehelkiisu cunaan tan ugu dhex dhexaadsan, masaakiinta uu cuntada siinayo wuxuu uga dhigi karaa qado ama quraac ama casho ilaa ay ka dhargaan ama wuxuu siinayaa cunto ku filan hal habayn waxaana lagu qaddaray saac barkiis (oo u dhiganta kiilo iyo bar) cuntadaas oo ah bariis iyo wixi la mid ah.

Haddii ay noqoto inuu dhar bixiyo waa inuu dharkaasi noqodo mid cawrada asturi kara oo lagu tukan karo.

- **Qof dhaartiisa raaciyey Inshaa Allaah kafaare gud maleh**

Su’aasha 2aad: Muxuu yahay macnaha xadiiska Ibnu Cumar uu Rasuulka ka wariyey inuu yiri:

“Qofkii dhaarta oo raaciya dhaarta Inshaa Allaah, kuma dambaabayo (haddii aanu samayn wixii uu ku dhaartay).”

Jawaab: Xadiiskan macnihiisu waa: Insaanku haddii uu wax ku dhaarto oo uu yiraahdo inshaa Allaah kaddibna wuxuu ku dhaartay khilaafo kafaaro gud ku waajibi mayo, matalan haddii uu yiraahdo: Wallaahi inshaa Allaah waxaas ayaan samaynayaa kaddibna aanu samayn ama uu yiraahdo; Wallaahi inshaa Allaah waxaas ma samayn doono kaddibna uu wixii sameeyo, xaaladaha caynkaas oo kale kafaaro gud kuma waajibayo waayo wuxuu raaciyey dhaartiisa Inshaa Allaah.

Haddaba waxaa habboon qofkii dhaaranaya in uu dhaartiisa raaciyo Inshaa Allaah si haddii aanu samayn wixii uu ku dhaartay aan kafaare gud ugu waajibin, waxaa kaloo jirta faa’iido kale oo ku jirta dhaarta la raacinayo Inshaa Allaah, faa’iidadaas oo ah in qofka loo sahlo wixii uu ku dhaartay sababtoo ah wuxuu talo saaraty Allaah.

Allaah wuxuu yiri:

“Ruuxii Allaah talo saarta waa ku filan yahay, Allaahna amarkiisu waa fulayaa (waxna kama fakadaan) wax walbana Allaah wuxuu u yeelay waqti sugan.”

LABBISKA IYO XIJAABKA

- **Kabaha dhaadheer iyo rooseetada**

Su’aasha 1aad: Waa maxay xukunka in haweenku labistaan kabo dhaadheer iyo waxyaalaha kale ee la isku qurxiyo sida rooseetada oo kale?

Jawaab: Ma bannaana inay haweenku labbistaan kabaha dhaadheer haddii ay sidaasi khilaafayso caadada oo ay haweenka kale ka dhex muuqanayso.

Allaahna wuxuu yiri: “Ha u wareegaysanina (adinkoo is qaawinaya) sidii jaahiliyadii hore.”

Mana bannaana inay haweentu dibadda ula soo baxdo wax kasta oo ay isku qurxiso oo ay haweenka kale uga muuqanayso, dhibna ma lahan waxyaalaha kale ee ay haweenku isku qurxiyaan sida rooseetada iyo wixi la mid ah.

Waxaan iyana bannaanayn inay haweenku iska rifaan timaha sunniyaha ama ay qaar ka xiiraan, Rasuulkuna haweenka sidaas sameeya iyo kuwa lagu sameeyo wuu nacladay, waxaa iyana taas la mid ah inay ilkahooda qoraan oo ay fanax isu yeelaan dhammaantoodna Rasuulku wuu nacladay.

- **Burukada**

Su’aasha 2aad: Ma bannaan tahay inay haweenku buruko labbistaan iyagoo raggooda isu qurxinaya?

Jawaab: Way bannaan tahay labada is qabaa inuu mid walbaa kan kale isugu qurxiyo waxa uu jecel yahay xiriirkoodana xoojinaya, waase inay waxa la isku qurxinayaa noqdaan wax ay diintu oggoshahay oo aan xaaraan ahayn, sideedana burukada waxaa laga bartay oo isticmaalkeeda ku caan baxay haweenka gaalada, sidaas darteed haweenka Muslimiinta ah haddii ay labbistaan waxay isku shabaheen haweenkii gaalada xataa haddii ay raggooda isugu qurxinayaan, arrintaasina ma bannaana oo Nabigu wuu reebay wuxuuna yiri:

“Qofku cidda uu isku shabaho ayuu ka tirsan yahay.”

Tan kale burukadu waxay la macne tahay timaha lagu dabo timaha kale oo lagu dheereeyo, arrinkaasna Rasuulku wuu reebay, haweenka sidaas sameeyana wuu lacnaday.

- **Haweenku sanka ama dhegaha ma dalooshan karaan?**

Su’aasha 3aad: Muxuu yahay xukunka inay haweenku xirtaan san gashi?

Jawaab: Way bannaan tahay inay haweentu xirato waxyaalaha la isku qurxiyo sida caadiga ah, xataa haddii ay is qurxintaasi sababayso in jirka la dalooliyo sida dhegaha, waxaana rajaynayaa in sanka oo la dolooliyaa bannaan tahay, sida ay awrtaba ay u bannaan tahay in laga dalooliya sanka oo hoggaan lagu xiro iyadoo aan arrintaas lagu tirin inay tahay silic dilyayn.

- **Muslimaddu hablaha gaalada ah ka xijaaban mayso**

Su’aasha 4aad: Waxaa noo joogta gabar jaariyad ah oo gaalo ah, haddaba miyaan ka xijaabanaynaa, mase ii bannaan tahay in aan ku tukado dharka ay ii dhaqdo?

Jawaab: Sida saxiixa ah waajib ma ahan in aad ka xijaabatid haweentaas sida aadan hablaha kaleba uga xijaaban, dhibna malahan in aad ku tukatid dharka ay dhaqdo ama wax ku cuntid weelasha ay dhaqdo, waxaase waajiba haddii heshiiska aad la gasheen dhammaado in aad iska dhoofisaan haddii aysan islaamin, sababtoo ah Jasiiradda Carabta ma bannaana inay ka jirto diin aan diinta Islaamka ahayn, mana bannaana in shaqaale gaalo ah la keeno, shaqaalahaasi ha ahaado khaadimiin ama shaqaalo kale, rag iyo dumar kuu doono ha ahaado, waayo Nabigu wuu ka dardaarmay in mushrikiinta laga saaro Jasiiradda Carabta laba diinoodna aysan ku kulmi karin, sababtoo ah waa ubucdii Islaamka iyo qorrax ka soo bixii diinta Islaamka mana bannaana inay ka jirto diin aan ahayn diinta Islaamka.

- **U xijaabidda haweenka loogama dan lahan xabsi**

Su’aasha 5aad: Ma bannaan tahay in xiriirka loo gooyo qof Muslim ah oo tukada salaadaha waajibka ah hase yeeshee aan u xijaabin hablihiisa, mase bannaan tahay in salaad lagu xirto?

Jawaab: Macnaha looga dan leeyahay xijaabku ma ahan in haweenka la xabiso oo bixidda loo diidayo ee ahmiyadda laga leeyahay waa inay haweentu iska asturto ragga ajaanibta ka ah, gurigeedana aysan ka bixin iyadoo xiran dhar jilicsan ama ku dheggan oo jirkii muujinaya, haweentii sidaas fashana waxaa waajib ah in loo naseexeeyo iyada iyo cidda mas’uulka ka ahba, haddii ay naseexada iyo waanada qaataan waa Ilaahay mahaddiis, haddii ay diidaan naseexada mas’uuliyiinta meeshaas waxaa ku waajibaya inay wax ka qabtaan arrintaas iyo in wajiga loo xumeeyo xiriirkana loo jaro si ay u waano qaataan, Rasuulkuna wuxuu yiri:

“Ruuxii munkar arka gacantiisa wax ha kaga qabto, haddii uu kari waayana carrabkiisa, haddii uu kari waayana qalbiga ha ka kahdo, waana tan ugu daciifsan iimaanka.” Waxaa wariyey Axmed iyo Muslim iyo culimada kutubta Sunanta la yiraahdo iska leh.

Imaamnimada salaadda ee ninkaas hablihiisa u xijaabi waayey, ruuxii og haddii uu ninkaas ka goosto oo aanu salaadda la tukan, inay arrintaasi faa'iido keenayso oo uu is waansanayo hablihiisana u xijaabayo, waxaa ku waajiba in aanu la tukan sababtoo ah munkarka in la reebaa waa waajib, qofkii helaya cid isaga ka wanaagsan ee uu la tukado waa inuusan ninkaas la tukan, laakiin ruuxii ka cabsanaya inay salaadda jamaacadu dhaafto ama uu jamaacada haleeli waayo waa inu ninkaaas la tukado, sababtoo ah salaadda jamaacada iyo Jimcaduba waa waajib.

DAHABKA

- **Dahabka xirashadiisa iyo haweenka**

Su'aasha 1aad: Muxuu yahay xukunka haweenku inay dahab xirtaan?

Jawaab: Way u bannaan tahay haweenku inay dahab xirtaan waxaana arrintaas shardi u ah in aan lagu xad gudbin, si uusan israaf u noqon, haddii dahabka xirashadiisa xadkiisa la dhaafiyo waxay noqonaysaa israaf, Allaahna subxaanahu watacaala wuxuu yiri:

"Cuna oo cabba (wuxuu Alle idinku irsaaqo) hana ku xad gudbina, Allaah ma jecla kuwa xad gudubka badan."

Marka Allaah ma jecla israafka iyo mubadarnimada haddii ay noqoto cunitaan iyo cabitaan, labbis iyo gaadiid iyo wixi la mid ah, sidaas darteed waxaan leenahay haweenta way u bannaan tahay inay xirato dahab iyo qalin iyo waxyaalaha kale ee ay isku qurxiyaan iyadoo aan lagu israafayn.

- **Dahabka deyn ma lagu qaadan karaa**

Su'aasha 2aad: Naag ayaa waxay jinjimo dahab ah ku iibsatay lacag la isla xaddiday, dayn ahaan ayayna ku qaadatay haddaba arrintaas ma bannaan tahay?

Jawaab: Ma bannaana in dayn lagu qaato dahabka iyo qalinka, sidaas ayayna culimadu isku waafaqsan yihiin waxaana waajib ah in la celiyo haddii jinjimahii la hayo ama lacagtoodii la bixiyo.

Su'aasha 3aad: Ma bannaan tahay in qofka dahabka iibsanaya uu lacagta qaar bixiyo oo ku yiraahdo qofka dahabka leh, dahabka hayso ilaa aan lacagta kaaga soo dhammaystirayo?

Jawaab: Ma bannaana arrintaasi sababtoo ah haddii uu iibsado wuxuu iibkaasi u dhacayaa in dahabkaasi mulkigiisa uu ka wareegay qofkii lahaa una soo wareegay qofka iibsaday isagoon lacagtii

bixin arrintaasina waa xaaraan waxaana waajib ah inuu bixiyo lacagta oo dhammaystiran, markaas hadduu doono ii hay ha yiraahdo ama haka qaato, haddii la gorgortamo oo iyadoon iibku dhicin uu tago oo uu lacagta soo dhammaystiro kaddibna la kala iibsado arrintaasi way bannaan tahay sababtoo ah beecu ma dhicin lacagtoo kaamil ah mooyaane.